# Taageerida Ururrada Dadka Baahiyaha Gaarka ah La Nool si ay ugu Qareemaan Waxbarashada Loo Dhanyahay




# Buugga u Qareemidda


Waxaa loo diyaariyey:

Puntland Disability Organizations Network (PDON), Somalia

Disability Aid Foundation (DAF), Somalia

Adventist Development and Relief Agency (ADRA), Somalia

Save the Children, Somalia

Norwegian Association of Disabled

Waxaa soo saaray:

Enabling Education Network, December 2022


Disability Aid Foundation | ADRA | Save the Children | Inclusive Learning Approach | NAD - The Norwegian Association of Disabled | EENET

[Sharaxaada sawirka: Sawirku wuxuu muujinayaa koox weyn oo ilaa 30 rag iyo dumar ah oo qol ku dhex jira. Qaar baa dhabarka taagan qaarna hor fadhiyaan. Dhammaantood way dhoola cadeynayaan waxayna u egyihiin inay ku raaxaysanayaan.]

Buugaan waxaa laga heli karaa creative Common licence attribution - NonCommercial-ShareAlike 4.0 International. Wixii xog dheeraad ah, booqo: https://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/4.0/legalcode

# Nuxurka

Muxuu buugani ku saabsan yahay? ........................................................... 4

Qaybta 1aad: Waa maxay u qareemidda waxbarashada loo dhan yahay?......... 6

Qaybta 2aad: Kaalinta Ururrada Dadka Baahiyaha Gaarka ah La Nool (UDBGN) ee u qareemidda waxbarashada loo dhanyahay ............................................. 10

Qaybta 3aad: Foolaadka farriimaha waxbarashada loo dhanayahay ............... 30

Qaybta 4aad: Joogteynta isbedelka iyadoo loo marayo u qareemidda waxbarashada loo dhanyahay.................................................................. 39

Qaybta 5aad: Agab Waxtar leh ..................................................................... 50

Lifaaqyada (qalabyada iyo tilmaamayaash) ..................................................... 52

# Muxuu buugani ku saabsan yahay?

Buuggani wuxuu ka taageerayaa ururrada dadka baahiyaha gaarka ah la nool (UDBGN) shaqadooda sida u qareemidda waxbarashada loo dhan yahay. Wuxuu soo koobayaa duruustii laga bartay qaybaha tayaynta waxbarashada loo dhan yahay ee UDBGN, kaasoo lagu gudbiyay mashruuca (TOFI) ee Soomaaliya, 2021-2023. Duruustaasi waa:

- waa maxay u qareemidu iyo maxay ka dhigan tahay inaad ahaato u doode waxbarashada loo dhan yahay;
- Doorarka muhiimka ah ee u doodista ururada naafadu ay ciyaari karaan, xirfadaha iyo aqoonta looga baahan yahay doorarkan, agabka caawin kara, iyo goorta la isticmaalayo doorarkan iyo qalabkan;
- fariimaha waxbarashada ee loo dhan yahay ayadoo loo isticmaalayo shaqada u qareemidda si gacan looga geysto dhisidda wacyiga;
- maxay muhiim u tahay in la joogteeyo shaqada u qareemidda iyo sida loo hirgeliyo.

## Sideebaad u isticmaali kartaa buuggan?

Buuggani waa hage. Ma bixinayo dhammaan jawaabaha, laakiin wuxuu ina xasuusinayaa waxa aan samayn karno iyo waxa aan u isticmaali karno si aan u xoojino shaqadayada u doodista. Waana agab kale oo lagu garab-istcimaali karo agabka lagu sheegay cutubyada tababarka si loo xoojiyo awoodda u doodista waxbarashada loo dhan yahay.




**Sawirka 1aad: Afarta hage ee fududeeyaasha, sadex-da buug ee ka qeybgalayaasha iyo hagaha u qareemida waa dukumintiyada ugu muhiimsan ee qaabeeya xirmooyinka tababarka waxbarashada loodhanyahay.**

# Qaybta 1aad: Waa maxay u qareemidda waxbarashada loo dhan yahay?

## Waa maxay u Qareemidu?

- U qareemidu waa qaadista tallaabo lagu keenayo isbeddel bulsho oo togan oo wax ka bedela nolosha dadka, bulshooyinkooda, waddan, ama adduunka oo dhan.
- U qareemidu waxay tahay taageeridda dadka si ay u muujiyaan codkooda.
- U qareemidu waxay tahay in isbeddel lagu sameeyo hab-fikirka iyo saameynta qaab-fikirka hababka cusub.
- U qareemidu waa in isbedel lagu sameeyo habka hawlaha loo qabto (hab-dhaqanka), oo ay ku jiraan sida ay machadyadu u shaqeeyaan.
- U qareemidu waxay tahay dhisidda xiriirka dadka kale si loo sameeyo iskaashatooyin iyo shabakado gudaha iyo bulshada dhexdooda ah.
- U qareemidda waxaa ka mid ah ka-qaybgalka geedi-socdyada rasmiga ah ee isbeddelka (tusaale, ka qayb qaadashada qorista siyaasad cusub ee dawladda) ama hababka isbeddelka aan rasmiga ahayn (tusaale, ka hadalka masjidka taasoo ku saabsan xuquuqda dadka baahiyaha gaarka ah la nool).

## Yaa noqon kara u qareeme?

- Qof kastaa wuu noqon karaa u qareeme. Dhammaanteen waxaan nahay u qareemayaal marka aan sameyno wax aan ku keenayno isbeddel wanaagsan, haba yaraatee.
- U qareemayaasha wanaagsan uma baahna inay ahaadaan hoggaamiyeyaal ama ay noqdaan kuwa heerar sare ka gaarey aqoon iyo xirfad - laakiin marwalba waxay u taagan yihiin inay wax beddelaan ayna doonayaan inay waxyaabo cusub bartaan.




**Sawirka 2aad: Wasiirka waxbarashada dawlad gobaleedka koonfur galbeed Soomalia oo ku wareejinaya usha cad qof indhaha aan sifiican wax uga arag kulan ay soo qabanqaabisay DAF si kor loogu qaado wacyigalinta maalinta araga aduunka.**



**Sawirka 3aad: In si mutadawacnimo ah guryaha loogu qaybiyo agabka waxbarashada inta lagu jiro xidhitaanka dugsiga xilliga Covid-19**

In lala qabanqaabiyo kulan wakiilada dalwada si kor loogu qaado wacyigalinta waa tusaale u qareemida is badal ku yimaada qaabkii wax usocon jireen. .

## Waa maxay u qareemida waxbarashada loo dhan yahay?

- U qareemida waxbarashada loo dhan yahay waa ka shaqeynta isbedel lagu sameeyo hababka waxbarashada si togan si ay dhammaan ardaydu waxbarasho u helaan, wax u bartaan oo ay horumar u sameeyaan sida ugu fiican ee awooddooda.
- U qareemidda waxbarashada loo dhan yahay waa ka shaqeynta isbeddello taasoo waqti qaadan karta. Waa shaqo joogto ah si loo ogaado caqabadaha ka mid noqoshada iyo in la helo siyaabo wax looga qabto.
- U qareemida waxbarashada loo dhan yahay waxay ku saabsan tahay dhisidda iskaashiga ka dhexeeya dugsiyada, waalidiinta iyo xubnaha bulshada si ay u taageeraan dugsiyada una dhistaan una ilaaliyaan waxbarashada loo dhan yahay.





**Sawirka 4aad: Fadumo, ardayad isticmaasha kursiga naafada, yaa waxay si firfircoon hada uga qeybqaadaneysaa waxbrashada dugsigeeda maxaliga ah kadib taageero ay ka heshay PDON iyo dugsigeeda.**

# Qaybta 2aad: Kaalinta Ururrada Dadka Baahiyaha Gaarka ah La Nool (UDBGN) ee u qareemidda waxbarashada loo dhanyahay

## Waa maxay kaalinta UDBGN ee u qareemidda waxbarashashada loo dhanyahay?


UDBGN waxay kaalin muhiima ku leeyihiin u qareemidda waxbarashada loo dhanyahay.  Waa dabar xooggan oo isku haya dugsiyada iyo qaybaha bulshada gaar ahaan waalidiinta. Waxay qayb ka yihiin bulshada, fahan dheerna ka haystaan caqabadaha ay wajahaan bulshada iyo dugsiyadu. Xubnaha UDBGN waxay khibrad gaar ah u leeyihiin dhibaatooyinka taabanaya waxbarashada loo dhanyahay sida faquuqa iyo gaar u sooca. Waxay ku lug leeyihiin hay'adaha dawladda iyo go'aan gaarayaasha kale sidaa darteed waxay miiska soo saari karaan qadiyadaha muhiimka u ah waxbarashada loo dhanyahay. In kastoo doorar badan oo u qareemida ay ciyaari karaan UDBGN, haddana waxaa ugu muhiimsan shanta soo socda:

- Raadinta iyo uruurinta xog caddaynaysa isbedelka;
- Fududaynta wada shaqayn si loo dhiso iskaashatooyin iyo dallado xooggan oo ka shaqeeya isbedelka;
- Kor u qaadista wacyiga isbeddellada loo baahanyahay ee waxbarashada loo dhanyahay;
- Adeegsiga siyaasado lagu saameynayo go'aan qaadashada isbedelka;
- Dabagalka iyo taageeridda hababka isbedelka ee waxbarashada loo dhanyahay.



**Sawirka 5aad: Xubnaha DAF oo fiirinaya quudin laga sameynayo dugsi oo ay soo diyaariyeen gudiga waxbrashada loodhanyahay.**

Si loogu jiba keeno hawlaha u qareemidda, waa inaynu **KA FIIRSANNAA** oo **FEKERNAA** inta aynaan **FALIN/KU DHAQAAQIN**.




**Sawirka 6aad: Meertada ka FIIRSO, ka FEKER oo FAL .**

In loo ciyaaro doorarka si habsami leh macneheedu waa in laga fiirsado, lagana fekero waxa uu yahay is bedelka loo baahanyahay iyo kaalinta u qareemineed ee horseedi karta ( tusaale: kor u qaadidda wacyiga bulshada si dib loogu celiyo caruurta uga haray dugsiyada duruufaha ay keeneen abaaruhu). Kaalinta la rabo inaan qaadanaa waxay ku xirantahay hadba xaaladda, xaaladaha qaarna waxay u baahanyihiin inaan qaadanno hal door wax ka badan. Haddaba si aynu doorarkeenna u qareemineed si habsami leh ugu gudanno waa inaynu fahannaa:

- Waxa uu yahay doorka ay tahay inaan qaadanno
- Xirfadaha iyo aqoonta loo baahanyahay si doorka loo ciyaaro
- Agabka loo baahanyahay si doorka loogu taageero
- Goorta aynu adeegsan karno doorkan

## Raadinta iyo uruurinta xog caddeynaysa isbedelka



**Sawirka 7aad: Booqasho guri**

### Waa maxay doorkani?

Si isbedel aan u keenno, waa inaan fahannaa dhibaatada jirta. Inkastoo laga yaabo in aan wax badan ka ogaanno dhibaatada (tusaale ahaan, sababta carruurtu uga maqan yihiin dugsiga), haddana wax badan baa inaga qarsoomi kara, ama aynaan heli karin dhammaan macluumaadka aan u baahanahay si aan u qaadno tallaabo ku habboon. Sidaa darteed, ka qareemayaal ahaan, waa inaan marka hore ka fiirsannaa kana fikirnaa anagoo aruurinayna macluumaadka ku saabsan dhibaatada ka dibna waa inaynu u adeegsannaa cadeymahaas qaadidda tallaabooyin xog u ogaalnimo ku salaysan.

## Xirfado iyo aqoon caynkee ah ayaa loo baahanyahay?

Waxaynu u baahannahay:

- **Xirfadda dhageysiga wanaagsan** si aan u ogaanno khibradda dadka iyo dhibaatada aynu wax ka bedelayno;
- **Inaan weydiino su'aalaha saxda ah** si dadku niyad sami u dareemaan uguna dhiirradaan inay noo sheegaan say wax u arkaan;
- **Inaan baarno ilo wareedyo kale** oo dhibaatada ka war bixiya si aynu ugu xoojinno caddaymaheena ( sida, inaan akhrinno warbixinnada dawladda iyo ururrada maxalliga ah);
- **Kulminta xogaha iyo ilaalintooda** si aynu ugu helno si fudud una adeegsanno markaan u baahanno;
- **In caddaynta la hayo si qoto dheer u fahmo** iyadoo la wada falanqaynayo lagana fekerayo sida loogu adeegsan karo isbedelka.



**Sawirka 8aad: Xubin ka tirsan DAF oo booqanaysa, lana hadleysa waalid iyo ilmihiisa oo baahiyaha gaarka ah qaba si uu u fahmo baahidooda.**

## Agabyada waxtarka ah ee doorkan

- **Lifaaq 1:** Hagayaasha xog uruurinta;
- **Lifaaq 2:** Su'aalaha wanaagsan ee laga weydiiyo bulshada waxbarashada loo dhanyahay
- **Lifaaq 3**: Shanta(5) ha bee ugu fiican hababka dhegaysiga firfircoon
- **Lifaaq 5**: **Ilo kale oo wax ku ool ah**: Xirfadaha fududaynta/daadihinta loo dhanyahy(muuqaal)

## Goormaa adeegsan kartaa doorkan?

- In **lagu taageero dugsiyada iyo guddiyada waxbarashada** loo dhanyahay ee **dugsiyada** inay aqoonsadaan xannibaadaha waxbarashada loo dhanyahay;
- U **diyaar garowga kullamada** lala yeelanayo masuuliyihiinta guddoonka waxbarashda degmada. Waxaad u adeegsan kartaan xogta aad soo aruuriseen inaa tilmaan ka bixisaan nooca isbedel ee loo baahanyahay iyo sababta;
- **Dabagalka fulinta** waxbarashada loo dhanyahay. Waxaa u aruurin kartaan xogta si aad usii fahantaan shaqooyinka sida fiican idiinku socda ama idiin shaqeeyey iyo kuwa aan idiinku socon oo aan si fiican u shaqeyneyn.



**Sawirka 9aad: Xubno katirsan gudiga waxbarashada ee bulshada oo ku sugan dugsiga Mustaqbal oo indha-indhaynaya, kormeerayana dhismaha cusub ee dugsiga si ay u hubiyaan in lawada isticmaali karo.**

## Fududynta wada shaqayn si loo dhiso iskaashatooyin iyo dallado xooggan oo horseeda isbedelka.



**Sawirka 10aad: La shaqeynta guddiga waxbarashada loo dhanyahay ee dugsiga**

### Waa maxay kaalintani?

Waa muhiim in la aqoonsado xannibaadaha hor istaagi kara waxbarashada loo dhanyahay. Dhanka kale, ka qareemayaal ahaan, waa inaynu ka fekernaa waxyaabaha aynu bulshada ka caaawin karno si loo suuliyo xannibaahdaha, dugsiyadana looga dhigo kuwo u furan arday kasta. Doorkani wuxuu daarranyahay aqoonsiga dadka, kheyraadka iyo ururadda bulshada ee inaka caawin kara dhisidda waxbarasho loo dhanyahay. Waa door lagu abuurayo laguna joogtaynayo dallado bulsheed oo iska kaashada waxbarashada loo dhanyahay.

## Xirfado iyo aqoon caynkee ah baynu u baahanahay?

Waxaan u baahanahay inaan:


- **Si joogto ah u aqoonsano dadka, kheyraadka iyo ururrada bulshada** ee taageeri kara waxbarashada loo dhanyahay, kana fekerno sida ay u samayn karaan arrinkan;
- **Inaan abuurno fursado ay ku wada hadlaan** kooxaha qaba aragtiyaha kala duwan kuna boorrino qiimaha uu kala duwanaanshuhu u leeyahay waxbarashada loo dhanyahay
- **Fududayno ka qayb gal loo dhanyahay** ee kulamada si loo xoojiyo wada shaqaynta iyadoo la xaqiijinayo in si macno leh qof kasta uga qeybgalo kulan ka dareemana amni iyo tixgalin inta uu kulanka joogo.



**Sawirka 11aad: Xubno ka socda PDON oo Qardho ku sugan oo u sharaxaya qoysas iyo caruurtooda agabka guryaha waxloogu barto intii lagu jiray COVID-19**

## Agabyada waxtarka ah ee doorkan

- **Lifaaq 6: Khariiradda hantida ma guurtada ah ee bulshada** si loo baaro hantida ma guurtada ah ee bulshada loogana fekero sida ay u taageeri karaan waxbarashada loo dhanyahay
- **Lifaaq 4: Liiska hubinta** ee aqoon-is-weydaarsiga wada shaqaynta ama kulanka
- **Lifaaq 5: ilo kale oo wax ku ool ah:** Xirfadaha fududaynta/daadihinta loo dhanyahy (muuqaal) si loo sugo in kulamada bulshadu loo dhanyahay




**Sawirka 12aad: waat tusaale qariirada muujinaysa hantida bulshada oo ay soo saareen ka qeybgalayaasha intii lagu jiray gudbinta xirmada labaad ee tababarka, ayadoo lasoo soocay dadka, ururada iyo kheyraadka taageero ka geysan kara waxbarashada loodhanyahay goobaha maxaliga ah.**


## Goormaan adeegsan karnaa doorkan?

- Si **loo taageero dugsiyada iyo guddiyada waxbarashada loo dhanyahay ee dugsiyada** iyagoo lagu xirayo dadka, kheyraadka iyo ururrada bulshada ee caawin kara dhisidda waxbarashada loo dhanyahay;
- **Abuurista dallado xooggan oo taageera** waxbarashada loo dhanyahay iyadoo la fududaynayo wada hadallada u dhexeeya qaybaha bulshada;
- In la helo halabuuryo xal noqon kara oo lagu wajahayo xannibaadaha/caqabadaha jallaafaynaya waxbarashada loo dhanyahay loogana faa'iidaysto kheyraadka bulshada.




**Sawirka 13aad: Fududeeyaasha ka socda ururka naafada ee DAF oo booqanaya mid ka mid ah dugsiyada tijaabada ee mashruuca TOFI**

## Kor u qaadista wacyiga isbeddellada loo baahanyahay ee waxbarashada loo dhanyahay



**Sawirka 14aad: munaasabad ku saabsan wacyi galin bulsho.**

### Waa maxay doorkan?

Hab-dhaqannada dadka iyo waxyaabaha ay ka aaminsanyihiin waxbarashada loo dhanyahay waxaa asal u ah khibradooda, waxa ay rumaysanyihiin iyo casharrada waayuhu bareen. Si loogu wacyi galiyo bulshada waxbarashada loo dhanyahay, waa in loo saxaa fahanka waxbarashada loo dhanyahay. Doorkani wuxuu ku saabsanyahay sidii loo wajihi lahaa hab-dhaqannada gurracan iyo fikradaha khaldan iyadoo la doorinayo fahanka silloon ee dadka loona abuurayo fursado ay si kale ugu fekeraan uguna dhaqmaan. Waa door lagu xoojinayo hab-dhaqannada togan iyo garashada suuban laguna caawinayo dadku inay si wacan u garowsadaan muhiimadda waxbarashada loo dhanyahay.

## Xirfado iyo aqoon caynkee ah baa loo baahanyahay?

Waxaynu u baahanahay:

- **Inaan fahanno** hab-dhaqannada dadka iyo waxyaabaha ay rumaysanyihiin waxaa sal u ah khibradooda iyo waayaha ay soo joogeen;
- **Inaan ka falcelino qaabeeyayaasha hab-dhaqannadeena iyo waxyaabaha aynu rumaysannahay** si aan u fahanno sababta dadku ugu fekeraan una aaminsanyihiin waxa ay sameeyaan;
- **Inaan u muujinno dulqaad iyo dhibrin** dadka hab-dhaqannadooda iyo waxyaabaha ay aaminsanyihiin;
- **Inaan la wadaagno xog iyo tusaale wanaagsan** oo ku saabsan waxbarashada loo dhanyahay si dadku u arkaan waxa suurtoobi kara.



**Sawirka 15aad: Xubno ka socda ururada naafada oo kusugan Uganda oo ka hadlaya waxbarashada loodhanyahay bandhig radiye**

## Agabyada waxtarka ah ee doorkan

- **Lifaaq 7: Qaadista tallaabooyin cilmi-baariseed oo loo marayo meertada KA FIIRSO, KA FEKER oo FAL/SAMEE**. Waxaad tan u adeegsan kartaa inaad baarto kana fekerto hab-dhaqannada dadka iyo fahanka waxbarashada loo dhanyahay uguna qorshayso waxqabad wacyi-galineed oo ku haboon;
- **Lifaaq 8**: Foormka **Qorshaynta waxqabadyada** kor loogu qaadayo wacyiga;
- **farriimaha muhiimka ah ee** waxbarashada loo dhanyahay (Qaybta 3aad).

## Goormaynu adeegsan karnaa doorkan?

- Inaan **ku xoojinno fahanka go'aan gaarayaasha** (tusaale ahaan, maamulayaasha dugsiyada; masuuliyiinta dawladda; duqayda; culumada; ganacsatada iyo ururrada haweenka) iyadoo loo adeegsanayo kulamo lagu qaadaa dhigayo waxa ay tahay waxbarashada loo dhanyahay iyo waxa aysan ahayn;
- Inaan qorshayno, **abaabulno sidoo kalena qabano waxqabadyo wacyi-galineed** oo horseeda isbedel iyadoo si togan loo wajahayo hab-dhaqannada gurracan ee ka dhanka ah waxbarashada loo dhanyahay lana xoojinayo hab-dhaqannada wanaagsan;
- In **laga caawiyo waalidka** inay garowsadaan xuquuqda caruurtooda, fahmaan muhiimadda wax baristooda lagana saaro walaaca iyo cabsida;
- In **lala shaqeeyo guddiyada waxbarashada loo dhanyahay** si dugsiyada iyo fasallada looga suurta galiyo in dhammaan ardaydu tagaan, ka qayb qaataan kana guul gaaraan waxbarashadooda.




**Sawirka 16aad: Xubin ka tirsan DAF oo Kismayo kusugan oo kala hadlaya/hadleysa munaasabada wacyigalinta kor loogu qaadayo xubno ka tirsan bulshada rayid ka ah si kor loogu qaado wacyigalinta maalinta caalimiga ah ee luuqada calaamadaha.**

## Adeegsiga siyaasado lagu saameynayo go’aan qaadashada isbedelka.




**Sawirka 17aad: Adeegsiga siyaasad si isbadel loo keeno**

### Waa maxay doorkani?

Xannibaadaha ku gudban waxbarashada loo dhanyahay waa badanyihiin. Soomaaliya, sida badi dalal kale, waxbarashadu waa xaq dastuuri ah oo qof kasta leeyahay laguna ilaaliyo siyaasado gaar ah. Haddaba, doorkaan u qareemineed waa mid dadka lagu ogaysiinayo ama xasuusinayo siyaasadahaas laguna sharraxayo waxa ay dhigayaan. Waxaa lagu xoojinayaa wacyiga dadka gaara go’aannada waxbarashada ee heerarka kala duwan, sida maamulayaasha dugsiyada iyo masuuliyiinta waxbarashada ee degmooyinka, si ay ugu dhisaan go’aannadooda siyaasadahan. Dhanka kale, waxaa loo baahanyahay in waalidka iyo qaybaha kale ee bulshadu ay ku wacyi gashanyihiin siyaasadaha la xiriira, si ay u dardar galiyaan una dhowraan xuquuqda waxbarashada ee carruurtooda.


## Waa maxay xirfadaha iyo aqoonta loo baahanyahay?


Waxaan u baahannahay:

- Inaan **si qota dheer u fahanno siyaasadaha doorkan la xiriira** si aan ugu sharraxno dadka kale;
- Inaan fahanno u adeegsiga siyaasadda si wax kuool ah inay ka mid tahay in si joogto ah loo **aqoonsado caqabadaha** fulinta iyo in laga fekero sida looga gudbi karo loona xalin karo caqabadahaas;
- Inaan ka fekerno **erayo iyo farriimo fudud** oo aan usoo bandhigi karno bulshada kagana hadli karno siyaasadaha iyo fulintooda.

## Agabyada muhiimka ah ee doorkan

- **Lifaaq 7**: Adeegsiga tallaabooyin cilmi-baariseed oo loo marayo meertada **U FIIRSO, KA FEKER, oo FAL**.
    - o In loo fiirsado lagana fekero waxa siyaasaduhu dhigayaan iyo tallaabooyinka aad qaadi kartaan si dadku u fahmaan siyaasadaha;
    - o In la aqoonsado xannibaadaha/caqabadaha hor istaagi kara dhaqan galinta iyo sidii loo wajihi lahaa.
- **Qaybta 5: Agabyada waxtarka ah**: Siyaasadaha loogu qareemo waxbarashada dhammaan carruurta.








**Sawirka 18aad: Dastuurka ku Meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Siyaasadda Qaranka ee Waxbarashada loo Dhanyahay**

**SAMEE**: UDBGN oo marti galiya kulan wacyi-galin casumana haweenay tusaale fiican ah si ay ugala hadasho waalidiinta deegaanka muhiimadda inay gabdhahooda dugsiyada u diraan



**FIIRI**: tusaale, xubin ka UDBGN oo booqda guriga ardayda aan iman dugsiga si uu u ogaado sababta






**FEKER**: xubnaha UDBGN oo la kulma bahda ku daridda dugsiga( gudiga waxbarashada) si ay ugala hadlaan sidii gabdhaha iyo



**Sawirka 19aad: Waa muhiim inaan FIIRINNO oo ka FEKERNO inta aynaan FAL ku dhaqaqin**

## Goorma ayeynu adeegsan karnaa doorkan?

- **Inaan ku xoojinno dooddeena** xilliyada aan la kulmayno masuuliyiinta iyo waalidiinta ( tusaale ahaan, kor u qaadidda nabad gelyada dugsiga)
- **Inaan dadka fahansiino** in Soomaaliya leedahay haykal siyaasadeed oo taageeraya waxbarashada loo dhanyahay – sidaa darteed aysan ahayn wax cusub;
- **Inaan waalidiinta ogaysiino waxa siyaasaduhu dhigayaan** ee la xiriira xuquuqda carruurta si ay usii fahmaan.



**Sawirka 20aad: Xubno gudiga waxbarashada bulshada oo ku sugan dugsiga Mustaqbal oo ka doodaya sidii waxbarashada loodhanyahay looga hirgalin lahaa degmadooda.**

## Dabagalka iyo taageerridda hababka isbedelka ee waxbarashada loo dhanyahay




**Sawirka 21aad: Wadaagga xog ku saabsan waxbarashada loo dhanyahay.**

### Waa maxay doorkani?

Dhisidda waxbarasho loo dhanyahay waxay qaadanaysaa waqti, waxaana qayb ka ah is bedello waaweyn oo ku dhaca nidaamka waxbarashada, bulshada iyo ururrada. Doorkan waxaa lagu saxayaa nooca isbedel ee la rabo inuu dhaco iyadoo lala shaqaynayo dugsiyada si ay u aqoonsadaan daldaloolooyinka jira xalna ugu helaan. Waa door looga falcelinayo shaqooyinka sida wacan u socda, lagu xoojinayo isbedellada, laguna xaqiijinayo inaan wax ka baranayno shaqadeena.

## Xirfado iyo aqoon noocee ah buu u baahanyahay doorkan?

Waxaan u baahanahay:

- Inaan **ka falcelino waxaan ka barannay** waxbarashada loo dhanyahay iyo doorarkeena ka qareemayaal ahaan si aan kor ugu qaadno ku dhaqankeena;
- Inaan hubinno **hababka ururradeenu uga falceliyaan** is bedellada dhaca waqti kadib iyo inaan ka fekerno sidaan usii horumarin lahayn;
- Inaan **dhisno kalsoonida dugsiyada** iyo guddiga waxbarashada loo dhanyahay si aan isaga kaashano garashada daldaloolooyinka.




**Sawirka 22aad: Fududeeyaasha ururada naafada oo milicsanaya, waxna wada baranaya intii tababarka keer qaran uu ka socday Garowe**

## Agabyada muhiimka u ah doorkan

- **Lifaaq 8**: Agabka Is Qiimaynta Waxbarashada loo Dhanyahay ee UDBGN
- **Lifaaq 6**: Adeegsiga tallaabo cilmi baaris loo marayo meertada **FIIRI, FEKER oo FAL**. U adeegsada tan si loo garto shaqooyinka sida wacan u socda iyo meelaha in lasii horumariyo u baahan.

## Goormaa adeegsan kartaa doorkan?

- Si loo **xoojiyo doorkeena u qareemineed** anagoo wax ka baranayna wixii inoo qabsoomay, dhisaynana awooddeena si aan wax uga bedelno waxbarashada loo dhanyahay;
- Inaa **taageerno dugsiyada** anagoo kala shaqeynayna inay ka falceliyaan isbedelada dhacay, hawlaha sida la rabay u socda iyo meelaha daldaloolooyinku ka jiraan.




**Sawirka 23aad: Mid ka mid ah kormeerayaasha ka socda mashruuca TOFI oo xog ka bixinaya booqasho kormeer uu u kutagey dugsiyo kuyaal Jubaland**

# Qaybta 3aad: Foolaadka farriimaha waxbarashada loo dhanayahay

## Waa maxay farriimaha muhiim ka ah ee u qareemida waxbarashada loo dhanyahay?

Aragtiyaha iyo fahanka dadka ee ku aaddan waxbarashada loo dhanyahay waa kala duwanyihiin. Waxay ku xirantahay hadba waxay ka maqleen ama akhriyeen iyo khibraddooda shaqo ama shakhsiyeed ee waxbarashada loo dhanyahay.

Ka qareemayaal ahaan, waa inaan bogaadinnaa fahanka saxan, hab toganna u wajahnaa fahanka silloon ee ka dhanka ah waxbarashada loo dhanyahay.

Haddaba waa in aynu caddaynaa:

- Waa maxay farriimaha ugu muhiimsan ee aan rabno inaan gudbinno?
- Farriin caynkee ah baa ku habboon xaaladdaas? ( tusaale ahaan, u sharrixidda waalidka carruurta la nool baahiyaha gaarka ah habka raadraaca lammaan si ay ugu kalsoonaadaan inay u diraan carruurtooda dugsiyada).
- Yaan la xiriiraynaa, qaabkee baase ku haboon in farriinta loo gaarsiiyo? (tusaale ahaan, u adeegsiga sawirrada si farriimo loogu gaarsiiyo dadka aan wax akhrin).



**Sawirka 24aad: PDON oo shir laleh xubno bulshada ah kalana hadleysa waxbarasada loodhanyahay**







**Sawirka 25aad: Labada boor ee sare waxa lagu sameeyey Saambiya, waxayna hoga-tusaalaynayaan farriimaha waxbarashada loo dhanyahay oo loogu tala galay dhagaystayaal kala duwan. Kan dhanka bidix xiga wuxuu ku socdaa 'maamulayaasha dugsiyada' sidaa darteed waa qoraallo badanyahay, halka kan dhanka midig xiga loo diyaarshay 'bulshada' waxaana loo badshay sawirrada si fahanka dadka aan wax akhrin kor loogu qaado**.

Waa kuwan tusaalayaal farriimaha muhiimka ah ee laga gudbiyo waxbarashada loo dhanyahay:


Marka carruurtu ka hadho waxbarashada, dhibtu waa nidaamka ee maaha ardayda.

## Sawirka 26aad: Gaar u soocu/ka saaridda wuxuu dhacaa marka ardayga loo arko dhibaatada.




Markii aanu ardaygu tagayn dugsiga, ka qayb qaadanayn casharka, guul darraysto ama kaba haro waxbarashada, waxaa loo maleeyaa in ardaygu ahaa dhibta ayna tahay inuu is bedelo. In loo arko ardaygu inuu dhibta sabab u yahay, waxay horseedaysaa in lagu sunto ‘mid aan wax baran karin’, ‘gaabis’, ‘agab gaara buu rabaa’, ‘wax lama bari karo’. Dhanka kale, si xal loogu helo ardaygaas, waxaa la isku dayaa in ‘a toosiyo ardayga’ si uu ‘ardayda kale ula jaan qaado’.

Waxbarashada loo dhanyahay waxay eedda saaraysa nidaamka ee uma aqoonsanayso ardaygu inuu yahay dhibta. Arday kastaa wuxuu leeyahay baahi waxbarasho oo u gaara. Marka nidaamka waxbarashadu mid aa loodloodsamayn ama ku yar yahay hal abuurku si uu baahidii ardada oo dhan u daboolo, waxbrashadii way burburaysaa ama, ardaydu wax baran maayso. Sidaa darteed, waa in nidaamku is bedelaa si baahida ardayga loo daboolo. Marna ardaygu maaha dhibta, had iyo jeer waxaa dhibta waxbarashada sal u ah nidaamka.




**Sawirka 27aad: nidaamka waxbrashada ayaa ah dhibaat**

## Waxbarasho loo dhanyahay waa mid dhammaan ardaygu tagaan, ka qayb qaataan kana guul gaarayaan dugsiyada.

Waxbarashada loo dhanyahay ma aha kaliya in ardayda dugsiyada lagu daro, gaar ahaan kuwa la nool baahiyaha gaarka ah. Waxaa suurta gal in ardaydu dugsiga dhigtaan haddana aysan weli wax baran sababtuna tahay xannibaado u diidaya inay si buuxda qayb uga noqdaan ( sida, lagu lama xiriiro ardayda iinta ka qaba dhegaha luuqadda dhegoolayaasha/suundhabaalaha  ama waxaa dibindaabyeeya/cagajugleynaya ardayda kale xilliyada biririfyada).

Sidaa darteed, waxbarasho loo dhanyahay waxay suurowdaa marka dhammaan ardaydu:

- Joogaan dugsiga
- Ka qayb qaataan hawlaha waxbarashda iyo waxqabadyada bulsheed
- Kana jiba keenaan inta karaankooda ah




**Sawirka 28aad: Caruurta naafada ah oo kaga qeybgalaya dusigooda munaasabada online aheyd shirkii aduunka ee looga hadlayay naafada ayagoo soo gudbinaya khibradooda**

## Waxbarashada loo dhanyahay waxay u baahantahay iskaashi xooggan oo u dheexeeya bulshada iyo dugsiyada.

Waa muhiim inaan baarno, fahannana xannibaadaha/caqabadaha hor taagan waxbarashada loo dhanyahay ee ka jira bulshadeena.  Dhanka kale, waa inaynu ka fekernaa waxyaabaha inaka caawin kara baabi'inta xannibaadahaas keenina kara is bedel inuu dhaco.

Waxaa loola jeedaa inaan aqoonsano hantida bulshada – dadka, ururrada iyo kheyraadka in caawin kara.

Waxbarashada loo dhanyahay waxay la halmaashaa abaabulka kheyraadka bulshada iyo u adeegsigooda waxbarashada loo dhanyahay



**Sawirka 29aad: Kulan wada shaqayn ah oo dhex maraya qaybaha bulshada**

## Taageeridda nidaamka Iyo ardayga labaduba waa u muhiim waxbarashada loo dhanyahay.

Haddii carruurtu ka hadho waxbarashada, dhibtu waa nidaamka ee ma aha ardayga. Laakiin, waa in aynu u si gaara u eegnaa ardayga iyo waxa uu u baahanyahay si loogu caawiyo inuu wax u barto intii karaankiisa ah.

Waxbarashada loo dhanyahay waxay ka wajahaysa ardayda ka haraya dugsiyada laba dhinac:

- Taageeridda isbedel ku dhaca nidaamka;
- Taageeridda baahiyaha gaarka ah ee ardayda.

Haddii aynaan labadaas dhinac qaab dheelli tiran uga shaqayn, waxaynu xal u helaynaa dhibta barkeed. Habkaan laba dhinaclaha ah waxaa loo yaqaan habka raadraaca lammaan. Waxaynu u baahanahay:

- Is bedel ku dhaca nidaamka innagoo dhisayna awooddiisa si aan u aqoonsanno una wajahno xannibaadaha, sidoo kale u xaqiijinno in goobaha waxbarashada, hab-dhaqanka iyo qaababka waxbaristuba ka jawaabayaan kala duwanaanshaha iyo in loo dhanyahay.
- Xaqiijinta in arday kasta la buuxsho baahidiisa annagoo siinayna bari taar ku habboon ixtiraamaynana si ay u yimaadaan goobaha waxbarashada, uga qayb qaataan guulna uga gaaraan waxbarashadooda.



**Sawirka 30aad: Macalin ku sugan Zanzibar oo taageero shaqsiyadeed siinaya arday intuu casharku socday**

Diiradda saar nidaamka:Hubinta in deegaanka waxbarista iyo barashadu hab fikir ka iyo hababka ay ka jawaabayaan kala duwanaanshaha dhiirri galinayaanna in kawada qeybgalka. Meeshana ka saarayaan  xannibaadaha.

Diiradda saar bartaha:
Ixtiraamka ra'yigooda iyo siinta taageero ku habboon sida ay xaqa u leeyihiin. Tani waxay u horseedaysaa awood siintooda joogaanna dugsiya, ka qaybgalaan kana guul gaaraan waxbarashadooda.





**Waxbarasho loo dhanyahay**
= Ka jawaabidda kala duwanaanshaha

**Sawirka 31aad: Habka raadraaca lammaan**

# Qaybta 4aad: Joogteynta isbedelka iyadoo loo marayo u qareemidda waxbarashada loo dhanyahay

## Waa maxay joogteynta waxbarashada loo dhanyahay?

Joogteyntu waa xaqiijinta in isbeddellada lagu dhisayo waxbarashada loo dhanyahay yihiin qayb ka mid ah hannaanka waxbarashadu kusii shaqaynayso mustaqbalka.

Isbedelka noocaan ahi durba ma mira dhalo, sidaa darteed waa inaynu si joogto ah u wadnaa u qareemidda waxbarashada loo dhanyahay.

Isbedelada ugu saameynta badan waxay ka dhacaan afar aag/meel:

- **Nidaaanka waxbarashada** -iyadoo aan xoojinayno siyaasadaha waxbarashada loo dhanyahay lana dhaqan galiyo.
- **Bulshada** – iyadoo aan xoojinayno iskaashiyada u dhexeeya qaybaha bulshada abuuraynana hab-dhaqan wanaagsan.
- **Ururradeena** - iyadoo aan dhisayno awooddeena u qareemineed ka UDBGN ahaan.
- **Kheyraadka**- iyadoo aan xaqiijinayno in shaqaalaha (sida barayaasha) iyo maaliyadda (sida miisaaniyadda) ay taageerayaan waxbarashada loo dhanyahay.

Waa inaan ka fekerno waxqabadyada u qareemineed iyo xeeladaha ku habboon inay horseedaan isbedellada aan hiigsanayno mustaqbalka fog.




**Sawirka 32aad: Xubno ururada naafada ee kusugan Uganda oo u qareemaya waxbrashada loodhanyahay iyo muhiimada ay u leedahay koboca dhaqaale ee degamadooda**

## Nidaamka waxbarashada

### Xeelado noocee ah ayaan u adeegsan karnaa si aan uga gaarno isbedello waara nidaamka waxbarashada?

- Waxaan iskaashi la yeelan karnaa **guddiyada waxbarashada loo dhanyahay ee dugsiyada** si loo wajaho xannibaadaha hor istaagi kara in bulshadu u dhantahay waxbarashada.
- Waxaan sii wadi karnaa inaan ka taageerno dugsiyada **inay xoojiyaan hawlaha sida habsamida leh ugu socda** innagoo daba galayna in dugsiyada laga dhaqan galiyo waxbarashada loo dhanyahay.
- Waxaan xoojin karnaa **iskaashigeena guddoonka waxbarashada gobolka** si loo xaqiijiyo in dugsiyada oo dhan ay yihiin kuwo loo dhanyahay.



**Sawirka 33aad: Xubin oo PDON ah oo kala hadlaya muhiimada waxbarashada loodhanyahay hogaanka bulshada:**

- Waxaan adeegsan karnaa **siyaasado horseedaya isbedel** kuwaas oo aan tixraac ka dhigan karno xilliyada wada hadalladu ina dhex marayaan maamulayaasha dugsiyada iyo masuuliyiinta dawladda, waxaana kala sii shaqaynaynaa sidii looga dhaqan galin lahaa dugsiyada siyaasadda waxbarashada loo dhanyahay.
- Waxaan xaqiijin karnaa in **dhammaan siyaasadaha saameynaya waxbarashadu (xata kuwa cusub) inay taageerayaan u dhammaanshaha**. Siyaasadahani waxay noqon karaan kuwo qaran, degmo ama dugsiyeed.




**Sawirka 34aad: Matalaadda dadka baahiyaha gaarka ah la nool ee Golaha Wakiillada**

## Bulshada

### Sidee baan si waarta wax uga bedeli karnaa bulshada?

- Waxaan aqoonsan karnaa iskaashina la sameyn karnaa **dadka bulshada saameynta ku leh**, sida culumada.
- Waxaan la shaqayn karnaa **waalidiinta iyo qoysaska carruurta baahiyaha gaarka ah la nool**. Waxaan ku booqan karnaa ardayda guryahooda si aan u ogaano caqabadaha bulshada ka haysta iyaga iyo waalidiintoodu.
- Waxaan yagleeli karnaa **kooxo waalidiin deegaanka kasoo jeeda oo is taageera**. Waxaa aqoonsan karnaa waalidiinta qiimeeya waxbarashada si ay bulshada tusaale ugu noqdaan una dhiirri galiyaan waalidiinta kale.



**Sawirka 35aad: Xubin ka tirsan PDON oo waalidiinta kala hadleysa waxbarashada loodhnyahay, lana wadaageysa agabka guryaha waxlooga barto si ay ardada u taageeraan inta lagu jiro covid-19**

- Waxaan **sii wadi karnaa kor u qaadista wacyiga bulshada ee waxbarashada loo dhanyahay**, kuna caawin karnaa in bulshadu ka guurto hab-dhaqannada gurracan (tusaale ahaan, waa in masaajiadda iyo goobaha bulshada ku kulanto looga hadlo waxbarashada loo dhanyahay).
- Waxaan dadka ku wacyi galin karnaa **siyaasadaha qaran ee heer degmo**, dhaqan galintoodana waxaan ka gaysan karnaa gacan.
- Waxaan xoojin karnaa **iskaashiga lala samaynayo bulshada.** Waxbarasho loo dhanyahay ma suuroobayso haddaan laga wada shaqayn. Waa inaan had iyo jeer ogaanaa hantida hantida aan heysano ee bulshada kana shaqaynaa in loo adeegsado waxbarashada loo dhanyahay.



**Sawirka 36aad: Kulan bulsho oo ay soo qabanqaabisay PDON si kor loogu qaado wacyigalinta bulshada ee waxbarashada loodhanyahay**

## Ururradeena

### Sidee baan si waarta wax uga bedeli karnaa ururradeena?

- Waxaan dhisi karnaa awooddeena u qareemineed ee heer degmo (tusaale ahaan, waxaan tababari karnaa hoggaamiyaasha cusub ee ururradeena iyo qaar ka mida dadka la nool baahiyaha gaarka ah si ay ugu doodaan waxbarashada loo dhanyahay).
- Waxaan carbin karnaa u qareemayaal deegaanka ah oo hormuud ka noqda waxbarashada loo dhanyahay.



**Sawirka 37aad: Mid ka mid ah fududeeyaasha ururada naafada oo xog dib ula wadaagaya kadib shaqo kooxeed intii lagu jirey tababarka heerka qaran ee u qareemida waxbarashada loodhanyahay**

- Waxaan sii wadi karnaa inaan **baarno kana baaraan-degno xannibaadaha waxbarashada loo dhanyahay**. Waa hubaal in hadba xannibaad cusub imaanayso (sida COVID-19, abaaro iyo colaad). Waa inaan mar kasta baarnaa xannibaadaha ka dhex jiri kara bulshada kana wada hadalnaa.
- Waxaan sii wadi karnaa **inaan wax barano ka qareemayaal ahaan**. Waa inaan xaqiijinaa inaan had iyo jeer wax ka baranayno shaqada aan hayno, aqoonta aan baranana u adeegsanaa inaan ku hor marino shaqadeena.



**Sawirka 38aad: Fududeeyaasha ururada naafada oo dib u eegis ku sameeynaya hawlaha iyo falalka laxiriira intii lagu djirey gudbinta tababarka ee Jawhar.**

## Kheyraadka

### Sidee baynu u heli karnaa kheyraad (agab, dad iyo maaliyadeed) oo joogto ah si aan ugu taageerno waxbarashada loo dhanyahay?

- Waxaan taageeri karnaa waxqabadyo dakhli abuuris ama waxaan la shaqayn karnaa ganacsatada deegaanka si dhaqaale loogu aruuriyo waxbarashada loo dhanyahay.
- Waxaan khariiradayn karnaa hantida (iyo kheyraadka) bulshadu leedahay -dadka, ururrada iyo agabka inaka caawin kara wajahidda xannibaadaha waxbarashada loo dhanyahay.
- Waxaan dardar galin karnaa adeegsiga kheyraadka deegaanka laga heli karo. Waxaan qaab farsamo iyo hal abuur ku jiro u xallin karnaa xannibaadaha waxbarashada loo dhanyahay.







**Masawirka 40aad: Xubno ka tirsan DAF oo taageeraya arday si uu u barto sida loo isticmaalo machineka wax loogu daabaco dadka indhaha waxka arag (Braille)**

- **Waxaynu garowsan karnaa inaan ka UDBGN ahaan nahay muhiim**. Waxaynu leenahay xirfado iyo agab aan la wadaagi karno bulshada, tusaale ahaan, waxaan bixin karnaa tababarro ku aadan ciyaaro loo dhanyahay.



**Sawirka 41aad: Xubno ka tirsan DAF oo booqanaya dugsi oo tusaya ardayda sida loo sacabiyo si dadka maqalka la,a ay u garan karaan**

- Waxaan u qareemi karnaa in **dawladdu maalgaliso dugsiyada waxbarashada loo dhanyahay**. Maalgalintaan waxaa qayb ka noqon karta inay dawladdu dugsiyada siiso qalabka iyo agabka kale oo ay u baahanyihiin ardayda la nool baahiyaha gaarka ah.



**Sawirka 42aad: Fadumo, ardayad isticmaasha kursiga naafada oo laga caawinayo inay gasho dugsiga ayadoo isticmaalaysa cagasaarta cusub ee ladhisay.**



**Sawirka 43aad: Ardayad oo araga laga hayo oo kugan Garowe taasoo markii hore aan si fiican u arki Karin ayaa hada si firfircoon uga qeybgalaysa waxbarashada kadib markey heshey daaweyn indhaha ah iyo ookiyaale.**

# Qaybta 5aad: Agab Waxtar leh

## Xeerarka/Siyaasadaha la isticmaalo si loogu doodo xuquuqda dhammaan carruurta ee waxbarasho

**Dastuurka Ku Meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012) (Ingiriis):**

https://bit.ly/FRSconstitENG

**Dastuurka Ku Meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012) (Soomaali):**

https://bit.ly/FRSconstitSOM

**Siyaasadda Qaranka ee Waxbarashada Baahiyaha gaarka ah ee Naafada iyo Waxbarashada Loo Dhan Yahay (SEND & IE) (2018) (Ingiriis):**
https://bit.ly/FRSiepolENG

**Siyaasadda Qaranka ee Waxbarashada Baahiyaha gaarka ah ee Naafada iyo Waxbarashada Loo Dhan Yahay (SEND & IE) (2018) (Soomaali)**

**Axdiga Xuquuqda Dadka baahiyaha gaarka ah la nool (qodobka 24):**

https://bit.ly/EENET-OPD5

**Axdiga Xuquuqda Carruurta (qodobka 28):** https://bit.ly/EENET-OPD6

## Agabyada caawiya fahamka iyo dhisidda waxbarasho loo dhan yahay

**Fiidiyowga xirfadaha tababarada loo dhan yahay:** https://bit.ly/EENET-OPD7

**Warbixinta UNESCO ee waxbarashada loo dhan yahay (2020):**
https://bit.ly/EENET-OPD8

**Dhammaan agabyada iyo macluumaadka UNESCO ee ku saabsan waxbarashada loo dhan yahay:** https://bit.ly/EENET-OPD9

**Awoodsiinta Shabakadda Waxbarashada (EENET) agabka waxbarashada loo dhan yahay:** https://www.eenet.org.uk/

## Lifaaqyada (qalabyada iyo tilmaamayaash)

- Lifaaqa 1aad: Tilmaamaha xog ururinta
- Lifaaqa 2aad: Su'aalo wanaagsan in la waydiiyo bulshada kuwaasoo ku saabsan waxbarashada loo dhan yahay
- Lifaaqa 3aad: Shan farsamo oo muhiim u ah wax dhegeysiga
- Lifaaqa 4aad: Liiska hubinta aqoon-is-weydaarsiga ama kulanka la wadaago
- Lifaaqa 5aad: Khariidaynta hantida bulshada
- Lifaaqa 6aad: Isticmaalka cilmi-baaris ficil ah iyada oo loo marayo EEG, FIKIR, wareegga SAMEE
- Lifaaqa 7aad: Qaabka qorshaynta ee waxqabadyada kor loogu qaadayo wacyiga
- Lifaaqa 8aad: Qalabka is-qiimaynta waxbarashada loo dhan yahay ee UDBGN
- Lifaaqa 9aad: Qaabka warbixinta ee hawlaha u qareemidda
- Lifaaqa 10aad: Sharaxayaasha sawirka

# Lifaaqa 1aad: Tilmaamaha xog ururinta

Xusuusnow inaan u baahanahay inaan eegno oo aan ka fikirno fikradaha dadku ay ka qabaan waxbarashada loo wada dhan yahay KA HOR inta aanan ku dhaqaaqin kor u qaadida wacyiga TALLAABADA KOOWAAD ee wanaagsan waa in aad dibadda u baxdo oo aad ka soo ururiso bulshada macluumaadka waxa ay ka aaminsan yihiin oo ay ka fahmsan yihiin waxbarashada loo dhan yahay.Macluumaadkani waa muhiim in la ogaado oo la fahmo isbeddelka loo baahan yahay - waan u isticmaali karnaa macluumaadkan siyaabo badan oo kala duwan xagga shaqadayada u doodista.

## 1.U diyaar-garowga macluumaad ururinta

Si aan u ururino macluumaad wanaagsan oo ku saabsan waxay dadku garanayaan oo ay ka fahmasanyihiin waxbarashada loo dhan yahay waa inaan si fiican u diyaargarownaa. Raac tillaabooyinkan si aad u hubiso inaad si fiican u diyaargarowday:

- Diyaari qorshe faahfaahsan oo ku saabsan sida aad u raaci doonto ururinta macluumaadka. Waana inay ku jiraan:
  - Yaa ka mid noqonaya kooxda si ay u ururiyaan macluumaadka iyo waa maxay doorka qof kasta?
  - Sidee baad ku gaadhi (ula xidhiidhi) doontaa bulshada iyo sidee baad uga ururin kartaa macluumaadka (hababkaaga)?
- Markaad dhammayso qorshaha hubi in qof walba oo kooxda ka tirsan uu fahmay doorkiisa/doorkeeda iyo sida ay u ururin doonaan macluumaadka.
- Hubi in dhammaan qabanqaabada loo baahnaa la qabtay. Qaar ka mid ah waxyaabaha muhiimka ah ee la diyaariyo waa:
  - Habaynta/diyaarinta gaadiidka
  - Qalabka lagu duubo macluumaadka/laguna qoro waxa ay dadku sheegaan
- Hubi in xubnaha kooxda ee ururin doona macluumaadka ay dareemaan kalsooni (waa inay si taxadar leh u akhriyaan qaybta "ururinta macluumaadka wanaagsan" (eeg hoos)
- Waa fikrad wanaagsan in dadku iska kaashadaan si ay u ururiyaan macluumaadka - laba-labo ama koox yar

- Hubi in xubin kasta oo kooxda ka mid ah uu haysto nambarada taleefanka xubnaha kale si la isula xiriiri karo haddii loo baahdo (koox WhatsApp ah waa fikrad wanaagsan)

## 2. Ururinta xog wanaagsan

Si aad u ogaato waxa ay dad kala duwan oo bulshada ahi ka aaminsan yihiin waxbarashada loo dhan yahay oo aan ururino macluumaad wanaagsan waa in aan weydiinaa su'aalaha saxda ah.

- **Waa maxay su'aalaha saxda ah ee la waydiinayo?**
  - Waxaan u baahanahay inaan waydiino su'aalo dadku jeclaadaan kadibna ay fur-furmaan oo ay ka hadlaan waxa ay la tahay. Waxaan ugu yeernaa su'aalahan kuwa FURAN
  - Waa kuwan tusaale su'aal FURAN:

**Maxay kula tahay macnaha waxbarashada loo dhan yahay?**

- Qofka ayaa markaa ka fekeri kara oo dhiibi kara fikrado u gaar ah - waxay isticmaalaan erayadooda waxayna wadaagaan aqoontooda
- Waxaan markaa eegi karnaa waxay nala wadaagaan waxaana bilaabaynaa inaan helno fikir waxay dadku u maleynayaan oo ay ka yaqaanaan waxbarashada loo dhanyahay
- Tani waxay naga caawin doontaa inaan helno waxa aan rabno inaan diirada saarno waxqabadyadeena wacyigelinta iyo waxay yihiin fariimaha muhiimka ah ee aan rabno inaan isticmaalno.
- Su'aalaha xiran, marka la barbardhigo, nagama caawinayaan inaan ogaano waxa ay dadku ka qabaan waxbarashada loo dhan yahay
- Waa kan tusaale su'aal xiran:

**Ma waxay kula tahay in waxbarashada loo dhan yahay ay siinayso dhammaan carruurta fursad ay wax ku bartaan?**

- Qofku wuxuu ku jawaabi karaa HAA ama MAYA. Laakiin waxaan ognahay oo kaliya inay ogol yihiin iyo inay diidan yihiin
  - o Runtii waxaanu u sheegaynaa waxa ay nala tahay waxbarashada loo dhan yahay, waana waydiinaynaa haddii ay ogolaadaan
- o Xaqiiqadii nagama caawinayso inaan ogaano waxay dhab ahaantii ka garanayaan ama fikirka ay ka qabaan waxbarashada loo dhanyahay

Waxa kale oo muhiim ah in si taxadar leh loo dhegeysto waxa ay dadku noo sheegayaan. Haddaba, maxaan u baahanahay inaan sameyno si aan u hubinno inaan si taxadar leh u dhegeysaneyno?

- **Sidee baad si taxadar leh u dhagaysan kartaa?**
  - Demi telefoonkaaga ka hor inta aanad bilaabin inaad dhegaysato qofka aad macluumaadka ka ururinayso
  - Ku mashquul qofka aad dhegaysanayso oo isku day oo tus in aad xiisaynayso waxa uu ku hadlayo
  - Fadhiiso ama istaag si aad qofka u wajahdo iskuna day inaadan ku mashquulin buuqa ama waxyaalaha hareerahaaga ka dhacaya.
  - Ha ka dhinac hadlin marka uu qofku hadlayo - marka uu dhammeeyo waxaad waydiin kartaa su'aalo daba-gal ah si aad u hubiso haddii aad fahantay ama si ay u sharaxaan wax badan oo ku saabsan wax ay sheegeen.
  - Hubi in qofku aanu dareemin in la xukumayo - ha dhiibin ra'yigaaga gaarka ah - u oggolow qofku inuu kuu sheego waxa uu qabo - xitaa haddii aadan ogolayn.

## 3. Isku uruuri dhammaan macluumaadka kuna xifdi meel ammaan ah

- Hubi inaad haysato hab aad ku xifdido dhammaan macluumaadka aad ka ururiso xubnaha bulshada. Siyaabaha qaar oo aad ku samayn karto waa:
  - o Haddii aad doonayso inaad waraysato dad bulshada ka mid ah, u shaqee laba-labo, hal qof ha weydiiyo su'aasha midka kalene ha qoro waxa uu qofku leeyahay.
  - o Haddii aad kulan la leedahay dad badan oo bulshada ka mid ah, hubi inuu kula socdo qof qoraal-qaade ah kaasoo qori kara waxay dadku sheegaan
  - o Isticmaal qalabka wax lagu duubo oo duub waxa uu qofku sheegayo (haddii qof uu haysto talefan casri ah waad duubi kartaa adigoo isticmaalaya telefoonkaaga)
- Markaad dhammayso ururinta macluumaadkaaga, hubso inaad si taxadar leh isugu keento dhammaan macluumaadka oo kadibna habayso si aad si fudud u heli kartid waxwalba.
- Waa kuwan qaar ka mid ah talooyin ku saabsan ilaalinta amniga /badqabka macluumaadkaaga iyo habayntooda.

- Haddii aad qof waraysatay oo aad qoraalo ka qaadatay, iska hubi inaad bog kasta ku qorto taariikhda iyo magaca qofka aad waraysatay ( dhib maleh haddii qof aanu doonayn inuu magaciisa sheego – waxaad qori kartaa cidda uu yahay. , tusaale, macalinka, waalidka ilmaha baahiyaha gaarka ah la nool)
- Haddii aad kulan la yeelatay waxna aad ka qortay, hubi inaad qorto taariikhda kulanka iyo cidda shirka joogtay (uma baahnid inaad hesho magacyada dadka oo dhan - waxaad dhihi kartaa, tusaale ahaan, waalidiinta carruurta baahiyaha gaarka ah la nool, Shaqaalaha dhalinyarada, xubnaha bulshada deegaanka)
- Haddii aad duubtay waraysiga/kulanka, iska hubi inaad ku kaydisay duubista meel ammaan ah - waa fikrad wanaagsan inaad ku kaydiso duubista laba meelood oo kala duwan haddii ay wax qaldamaan.
- Haddii aad duubtay waraysiga/kulanka, xasuuso inaad sidoo kale hayso qoraal ku saabsan faahfaahinta waraysiga/kulanka (taariikhda, wakhtiga, cidda) iyo magaca faylka. Waa kan tusaale:
    - Taariikhda: 12 August 2021
    - Magaca: Mrs Jamac, Maamulaha dugsiga hoose ee deegaanka
    - Magaca faylka: Jamac 12/8/2021

# Lifaaqa 2: Su'aalo wanaagsan oo ay tahay in la waydiiyo bulshada kuna saabsan waxbarashada loo dhan yahay

## 1.Maxay kula tahay macnaha waxbarashada loo dhan yahay?

**XUSUUSO:**

- Waa muhiim xaaladdan in aynaan u sharaxin dadka waxa ay tahay waxbarashada loo dhan yahay - waxaan rabnaa in aan maqalno waxay ay la tahay.
- Laakiin haddii qofku yiraahdo - ma garanayo waxa ay tahay, ama maxaad ula jeedaa? - Waxaad sharxi kartaa inaysan jirin jawaab sax ah ama khalad ah, kaliya waxaad xiisaynaysaa inaad ogaato inay garanayaan waxbarashada loo dhan yahay, ama haddii aysan garanayn, waxa macnaheedu noqon karo oo ay iyaga la tahay.

## 2. Ma la kulantay noloshaada wax saameeyay aragtidaada waxbarasho loo dhan yahay?

**XUSUUSNOW**

- Su'aashani waxay ku saabsan tahay waayo-aragnimada dadka si aad u ogaato inta suurtogalka ah
- Markaa, haddii ay HAA yidhaahdaan, weydii waxa ay waayo-aragnimadaasi ahayd iyo sababta ay muhiim u ahaayeen
- Haddi ay MAYA yidhaahdaan ama ay u muuqdaan kuwo aan hubin sida looga jawaabo su'aasha, waxaad markiiba weydiinaysaa
  - o Waa maxay waayo-aragnimadaada waxbarasho?
  - o Ma kula tahay inay ahayd mid loo dhan yahay? Waa maxay sababtu/maxaa diidaya?
  - o Waa sidee waxbarashada carruurtaada (haddii ay waalid yihiin) - ma kula tahay inay tahay mid loo dhan yahay? Waa maxay sababtu?

## 3.Ma ka warqabtaa carruur bulshadaada ka tirsan oo aan aadin dugsiga?

**XUSUUSO:**

- Haddii ay HAA yidhaahdaan, weydii sababta ay u malaynayaan in carruurtani aanay u aadin dugsiga

- Haddii ay yiraahdaan MAYA, waa arin fiican, kaliya u gudub su'aasha xigta

## 4.Waa maxay noocyada caqabadaha ay la kulmaan dugsiyada bulshadaada?

**XUSUUSO:**

- Sii qofka wakhti yar oo uu kaga fikiro su'aashan
- Marka hore u ogolow inay sheegaan caqabad kasta oo ay ka fikiri karaan
- Haddii ay dhib ku tahay inay ka fikiraan caqabado kasta, weydii haddii ay ka fikiri karaan caqabadaha la xidhiidha
    - kheyraadka/agabka (tusaale, waalidiin badan ayaa aad faqri u ah mana awoodaan inay iska bixiyaan kharashka dugsiga, dugsiguna dhaqaale ku filan kama helo dawladda)
    - xidhiidhka ka dhexeeya waalidiinta iyo dugsiyada (tusaale, waalidku aad uguma lug laha dugsiyada)
    - Macalimiinta (tusaale, macalimiintu waxaa u taal shaqo badan oo ay tahay inay  qabtaan )

# Lifaaqa 3aad: Shan farsamo oo muhiim ah wax dhegeysiga

## 1.Fiiro Gaar ah u Yeelo

Sii qofka hadlaya dhamaan dareenkaaga oo qir fariinta inaad heshay. Ogsoonow xubnaha aan afka ahayn ay sidoo kale "u hadasho" si aad ah.

- Si toos ah u eeg qofka hadlaya. U fiirso luuqadda jirka ee qofka hadlaya.
- Dhinac iska dhig fikradaha ku mashquulinaya. Maskax ahaan ha u diyaarin jawaab.

## 2. Tus in aad Dhageysaneyso

Isticmaal luuqadaada jirka iyo tilmaamo si aad u muujiso dareenkaaga. Madax ruxid, dhoola cadeyn oo isticmaal tibaaxo kale oo waji ah. Noqo mid furfuran oo soo jiidasho leh.

- Dhiirigeli qofka hadlaya inuu sii wado faallooyin yar oo afka ah

## 3. Bixi jawaab celin

Dhegeyste ahaan, doorkaagu waa inaad fahanto waxa la yidhi. Sidaa darteed, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka tarjumto waxa la yidhi oo aad waydiiso su'aalo.

- Dib u milicso wixii la yiri. "Waxa aan maqlayo waa..."
- Weydii su'aalo si aad u caddeyso qodobada. "Maxaad uga jeedaa markaad lahayd...?."
- Soo koob faallooyinka qofka hadlaya.

## 4. Ha ka dhex-galin

Ka dhex-galku waxay noqon kartaa niyad jab waxayna xaddidaysaa in si buuxda loo fahmo fariinta.

- U ogolow qofka hadlaya inuu dhammeeyo qodob kasta ka hor intaadan su'aalo weydiin.
- Ha la doodin

## 5.Si habboon uga jawaab

Dhegeysi firfircooni waa tusaale muujinaya ixtiraam iyo faham. Waxaad helaysaa xog iyo aragti.
Noqo mid ixtiraam leh, furfuran, si daacad ahna u jawaaba.
ula dhaqan qofka kale sida aad rabto in laguula dhaqmo.

# Lifaaqa 4aad: Liiska hubinta aqoon-is-weydaarsiga ama kulanka la wadaago

## 1.Doorarka iyo masuuliyadaha

- Hubi in qof kasta ay u cadahay ujeeddada aqoon-is-weydaarsiga/kulanka
- Hubi in qof kastaa garanayo waxa doorkiisu ku gadaaman:
  - o Abaabulka aqoon-is-weydaarsiga/kulanka
  - o Qabashada aqoon-is-weydaarsiga/kulanka

## 2.Casumidda/Martiqaadida ka qaybgalayaasha

- Martiqaad u dir dadka aad rabto inaad ku casuunto sida ugu dhakhsaha badan.
- Xusuusnow inaad ku qorto warqada martiqaadka dhammaan faahfaahinta kulanka sida - goobta, wakhtiga iyo taariikhda
- Xasuusnoow inaad ku darto nambarka lagala xiriiri karo haddii qof uu qabo wax su'aalo ama culays yimaado.


## 3.Diyaarinta goobta

- Hubi inaad u habaysay goobta sidaad rabto ka hor intaysan imaan ka qaybqaatayaashu
- Hubi in qalab kasta oo aad rabto in aad isticmaasho uu shaqaynayo
- Hubi inaad haysato dhammaan agabka aad uga baahan tahay aqoon-is-weydaarsiga
- Hubi in taleefannadaadu ay dab leeyihiin sidoo kale lambarka aad dadka siisay uu shaqaynayo.

## 4.Diyaargarowga iskudubaridida aqoon isweydaarsiga

- Inta uusan aqoon-is-weydaarsigu guda-gelin ajandaha, kawada hadla wixii su'aalo ah oo aad ka qabto aqoon-is-weydaarsiga/kulanka
- Dib uga fakar wixii aad ka barateen xirfadaha fududaynta ee wanaagsan – ka wada hadla dhaqamada aad rabto inaad isku daydo oo aad isticmaasho aqoon iswaydaarsiga si aad u suurtageliso dood wanaagsan.
- Xusuusnow inay jiraan dad aragtiyo gaar ah qabi kara aqoon-is-weydaarsiga/kulanka, fikrado adiga kaa duwan. Haddaba, iska hubi in qofna aanu dareemin inuu ku gawracan yahay hal aragti, kuna dhiirigeli dadka inay qiimeeyaan kala duwanaanshaha dhexdooda ah.

## Lifaaqa 5aad: Khariidaynta hantida bulshada




**Sawirka 44aad: Khariidaynta hantida bulshada**

**DADKA**

- Qof aqoon u leh shay waxtar leh
- Qofka leh xirfad aan isticmaali karno
- Qofka leh waayo-aragnimo/ khibrad waxtar leh
- Qof ku tabaruci kara wakhti
- Hogaamiye bulsho


**URURO/HAY'ADO**

- Hay'ad bixisa adeeg ay SIT isticmaali karto
- Urur caawin kara si loo gaadho bulsho gaar ah
- Urur gacan ka geysan kara wacyigelinta

**KHEYRAADKA LA TAABAN KARO**

- Goob loo isticmaalo shirarka
- Adeeg dawladeed oo ay SIT u baahan karto
- Masjidka oo ah kan kulmiya xubnaha bulshada
- Noocyada kala duwan ee gaadiidka dadweynaha
- Dukaamada siin kara dugsiga agab

## Lifaaqa 6aad: Isticmaalka cilmi-baaris ficil ah Ayadoo loo marayo EEG, FIKIR, WAREEG SAMEE




- Eeg oo u fiirso waxa dhibku yahay iyo waxa u baahan in la beddelo

- Go'aanso tallaabooyinka aad rabto inaad wax kaga qabato dhibaatada
- Horumari oo dhamaystir qorshe ku hagaya
- Yaa bulshada ka mid ah oo ku caawin kara oo ku taageeri kara inaad tallaabadan qaado?

Sawirka 45aad

- Ka fakar dhibaatada iyo waxa keenaya
- Kala hadal dhibaatada ururkaaga
- Maxaa laga qaban karaa dhibaatada?

## Lifaaqa 7aad: Qaabka qorshaynta ee waxqabadyada kor loogu qaadayo wacyiga

| | Maxaan samayn doonaa? | Yaa masuul ka noqon doona? | Goorma ayaynu samayn doonnaa? |
|---|---|---|---|
| Tallaabada 1aad: Waa maxay hawlaha wacyigelinta ee aan sameyneyno | | | |
| Talaabada 2aad: yaynu la shaqaynaynaa | | | |
| Talaabada 3aad: Sideen ugu diyaar garoobi doonaa hawshayada wacyigelinta | | | |
| Tallaabada 4aad: Milicsiga iyo ka warbixinta hawsha | | | |

# Lifaaqa 8aad: Qalabka is-qiimaynta waxbarashada loo dhan yahay ee UDBGN

## Aaga 1aad ee kartida: Aqoonta aasaasiga ah ee waxbarashada loo dhan yahay

- Fahamka waxbarashada loo dhan yahay, baaxadda caqabadaha hortaagan waxbarashada loo dhan yahay, iyo sida ay waxbarashadu u ekaanayso ficil ahaan deegaankaaga/dalkaga
- Fahamka iyo aaminidda sida waxbarashada loo dhan yahay ay uga faa'iidaysan karaan dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan kuwa leh baahiyaha gaarka ah.

## Aaga 2aad ee kartida: Iskaashi waxbarasho loo dhan yahay

- Awoodda iskaashi iyo in si mug leh loola xiriiro kuwa kale (gaar ahaan waalidiinta iyo daryeelayaasha) arrimaha la xiriira waxbarashada loo dhan yahay
- Aqoonsiga iyo raadinta fursadaha iyo xoojinta xiriirka wada shaqayneed ee ka jira dugsiyada bulshada

## Aaga 3aad ee kartida: U doodista waxbarasho loo dhan yahay

- In la fahmo waxa ay tahay u qareemiddu iyo sababta ay muhiim ugu tahay dhisidda iyo joogtaynta waxbarashada loo dhan yahay
- Awoodda hirgelinta xirfadaha muhiimka ah, agabka iyo doorarka si loogu qareemo waxbarashada loo dhan yahay
- Awood joogta ah si loo qorsheeyo, loona fuliyo waxna laga barto hawlaha u qareemidda si loo taageero dhismaha waxbarashada loo dhan yahay

| Aaga 1aad ee kartida: Aqoonta aasaasiga ah ee waxbarashada loo dhan yahay | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | **Billaw** | **Horumar sameyn** | **Xirfadle** | **Khabiir/ku xeel dheer** |
| **Fahamka waxbarashada loo dhan yahay, caqabadaha kala duwan ee hortaagan waxbarashada loo dhan yahay, iyo sida ay waxbarashada loo dhan yahay xaqiiqo ahaan u eg tahay deegaankaaga/dalkaga** | Aniga/ururkaygu waanu ka warqabnaa waxbarashada loo dhan yahay, waxaanan magacaabi karaa dhawr caqabadood oo hortaagan waxbarashada loo dhan yahay, laakiin xagga dadka baahiyaha gaarka ah la nool oo keliya. | Aniga/ururkaygu waxa uu qeexi karaa caqabadaha kala duwan ee hortaagan waxbarashada loo dhan yahay (ay ku jiraan caqabadaha nidaamka waxbarashada) waxaana bixin karaa tusaalooyin kala duwan xaaladdayda/xaaladayada iyo waaya-aragnimadayda/waaya-aragnimadayada. | Aniga/ururkaygu wuxuu si cad u sharxi karaa farqiga u dhexeeya waxbarashada loo dhan yahay iyo waxbarashada gaarka ah waxaanan sharxi karaa sida fikradaha sida habka mataanaha loogu baahan yahay si horumar loogu sameeyo waxbarashada loo dhan yahay. | Aniga/ururkaygu waxa uu leeyahay faham aad u cad oo faahfaahsan oo ku saabsan waxbarashada loo dhan yahay, waxa aanu awoodnaa in si joogto ah loo qiimeeyo loogana jawaabo caqabadaha cusub ee waxbarashada ee soo ifbaxaya, waxana uu si firfircoon u isticmaalaa aqoontan si uu u caawiyo dadka kale ee ka midka ah ururka iyo bulshada guud si ay u horumariyaan fahamkooda. iyo inay kor u qaadaan wacyiga waxbarashada loo dhan yahay |
| **Fahamka iyo aaminidda sida waxbarashada loo** | Aniga/ururkaygu waa ogsoonyahay | Aniga/ururkaygu waxaanu fahansanahay sida waxbarashada loo | Aniga/ururkaygu wuxuu si adag u aaminsanahay in | Aniga/ururkaygu wuxuu si cad ugu sharxi karaa dhammaan ardayda faa'iidooyinka |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **dhan yahay ay uga faa'iidaysan karaan dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan kuwa baahiyaha gaarka ah la nool** | sida carruurta qaarkood looga saaro waxbarashada sababo kala duwan awgood. | dhan yahay ay uga faa'iidaysan karaan inta badan ardyada laakiin ma hubo in ay ka caawin karto ardyada dareenka iyo kuwa baahiyo badan oo gaara la nool | waxbarashada loo dhan yahay ay faa'iido u leedahay dhammaan ardayda marka la eego isbeddelka heerka nidaamka saxda ah iyo taageerada shakhsi ahaaneed, tanina waxay ka muuqataa mabaadi'dayada iyo shaqadayada | waxbarashada loo dhan yahay, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn ardayda baahiyaha gaarka ah la nool, waxayna si firfircoon u isticmaalaan aqoontan si ay wax uga qabtaan caqabadaha hab-dhaqanka ee guud ahaan ururka iyo guud ahaan bulshada dhexdeeda. |
| **Aaga 2aad ee kartida: Iskaashi waxbarasho loo dhan yahay** | | | | |
| **Awoodda iskaashi iyo in si mug leh loola xiriiro kuwa kale (gaar ahaan waalidiinta iyo daryeelayaasha) arrimaha la xiriira waxbarashada loo dhan yahay** | Aniga/ururkaygu waa og yahay inay muhiim tahay in lala shaqeeyo kuwa kale, gaar ahaan waalidiinta iyo daryeelayaasha | Aniga/ururkaygu waxaanu aqoonsan karnaa noocyada dadka kala duwan ee mihiimka ah iyo agabyada kala duwan ee bulshada kuwaas oo qiimo u leh in ay taageeraan horumarka | Aniga/ururkaygu waxa aanu xidhiidh adag oo togan la leenahay waalidiinta iyo daryeelayaasha guud ahaan bulshada | Aniga/ururkaygu waxa uu horseedaa hindise ka-qaybgal bulsho oo joogto ah oo ku saabsan arrimaha la xidhiidha waxbarashada loo dhan yahay, iyo sidoo kale taageeridda iyo dhiirigelinta hindisayaasha kuwa kale ee |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | si loo gaaro waxbarasho loo dhan yahay | ku wajahan waxbarashada loo dhan yahay | deegaanka waxaanuna si joogto ah ula shaqeeynaa iyaga iyo bulshada guud arimaha la xidhiidha waxbarashada loo dhan yahay | degaankayga/degaankayaga. Aniga/ururkaygu waxa uu si joogto ah u qiimeeyaa habkayaga si aanu u qiimayno sida wanaagsan ee aanu ula xidhiidhno oo aanu ula shaqayno kuwa kale, gaar ahaan waalidiinta iyo daryeelayaasha, si aan u gaarno yoolalkayaga |
| **Aqoonsiga iyo raadinta fursadaha iyo xoojinta xiriirka wada shaqayneed ee ka jira dugsiyada bulshada** | Aniga/ururkaygu waanu ka warqabnaa hindisayaasha dugsiyada deegaanka sida horumarinta 'kooxaha ka mid noqoshada dugsiga' | Aniga/ururkaygu waxa aanu la xidhiidhnay dugsiyada deegaanka si aanu u aragno sida aniga/ururkaygu uu u taageeri karo dugsigu dadaalka uu ugu jiro in uu noqdo mid loo wada dhan yahay | Aniga/ururkaygu waa xubin firfircoon oo ka tirsan kooxda ka mid noqoshada dugsiga iyo/ama waxa ay si firfircoon ula shaqaynayaan oo ku taageerayaan dugsiga hindisihiisa si uu u noqdo mid loo wada dhan yahay | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay door muhiim ah oo aan ku xoojinayo iskaashi wadajir ah oo faa'iido u leh bulshadayda iyo dugsiyada degmadayda. Kuwo kale waxay aqoonsadaan doorka muhiimka ah ee aniga/ururkaygu uu ciyaaro waxayna inta badan naga codsadaan taageeradayada xagga xoojinta cilaaqaadka iyo soo jiidashada khibradeena la xiriirta ka mid noqoshada dadka baahiyaha gaarka ah la |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | | | nool. |

| **Aaga 3aad ee kartida: U doodista waxbarasho loo dhan yahay** | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | **Billaw** | **Horumar sameyn** | **Xirfadle** | **Khabiir/ku xeel dheer** |
| **In la fahmo waxa ay tahay u qareemiddu iyo sababta ay muhiim ugu tahay dhisidda iyo joogtaynta waxbarashada loo dhan yahay** | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay faham aasaasi ah oo ku saabsan u qareemiddu waxa ay tahay iyo sababta ay muhiim ugu tahay waxbarashada loo dhan yahay. Laakin aniga/ururkaygu kuma kalsoona inaan sharaxo waxa ay tahay. | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay faham cad oo ku saabsan u qareemiddu waxa ay tahay iyo sababta ay muhiim ugu tahay waxbarashada loo dhan yahay. Aniga/ururkaygu waxa uu sharxi karaa qaar ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee ku saabsan u qareemidda laakiin waxa weli jira daldaloolo xagga aqoontayda. | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay faham buuxa oo ku saabsan waxa u doodiddu tahay iyo sababta ay muhiim ugu tahay waxbarashada loo dhan yahay. Aniga/ururkaygu wuxuu dareemaa kalsooni inaan sharixi karno waxa ay tahay iyo sababta ay muhiim u tahay in la dhiso lana joogteeyo waxbarasho loo dhan yahay | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay faham aad u cad oo faahfaahsan oo ku saabsan waxa u qareemidu tahay. - Aniga/ururkaygu waxaan ku kalsoonahay inaan sharixi karno waxa u qareemiddu tahay iyo inaan ka caawiyo dadka kale inay horumariyaan aqoontooda iyo fahamka sida ay ugu isticmaali karaan horumarinta iyo joogtaynta waxbarashada loo dhan yahay ee bulshadooda. |
| **Awoodda lagu dabaqo xirfadaha** | Aniga/ururkaygu waanu ka | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay | Aniga/ururkaygu waxa uu adeegsadaa | Aniga/ururkaygu wuxuu si joogto ah u isticmaalaa xirfado iyo |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **muhiimka ah, agabka iyo doorarka si loogu qareemo waxbarashada loo dhan yahay** | warqabnaa agabka muhiimka ah, xirfadaha iyo doorka u qareemidda ee aan u isticmaali karno in aan u qareeno waxbarashada loo dhan yahay. | faham cad oo ku saabsan qalabka muhiimka ah, xirfadaha iyo doorarka aan aniga/anaga u isticmaali karno inaan ugu doodno waxbarashada loo dhan yahay. | agabka iyo xirfadaha muhiimka ah waxana u isticmaalnaa doorar kala duwan ee u qareemidda si uu u taageero waxbarashada loo dhan yahay. | qalabyo muhiim ah waxaana uu isticmaalaa doorar kala duwan ee u qareemidda si uu wax uga qabto caqabadaha waxbarashada loo dhan yahay ee bulshada dhexdeeda. Waxaan sidoo kale u tababarnaa xubnaha kale si ay u isticmaalaan qalabkan iyo xirfadahan oo aan qaadano doorar kala duwan ee u qareemidda. |
| **Awood joogta ah si loo qorsheeyo, loona fuliyo iyo in wax laga barto hawlaha u qareemidda si loo taageero dhismaha waxbarashada loo dhan yahay** | Aniga/ururkaygu waxa uu leeyahay xoogaa faham ah sida loo qorsheeyo oo loo hirgeliyo hawsha u qareemidda si aan u taageerno waxbarashada loo dhan yahay laakiin waxa aan halgan ugu jirnaa fahamka doorka u qareemista aniga/anaga | Aniga/ururkaygu wuxuu leeyahay faham cad oo ku saabsan sida loo qorsheeyo oo loo hirgeliyo hawsha u qareemidda si loo taageero waxbarashada loo dhan yahay. Aniga/Annagu waan fahansanahay doorarka u doodista ee aan ciyaari karno iyo sababta ay | Ururkaygu waxa uu leeyahay qorshe u qareemid oo aanu u isticmaalno si uu noogu hago shaqadeena qorshahan waxa ku jira doorar kala duwan ee qareemid ah. Waanu ka warqabnaa muhiimada ay leedahay dib u milicsiga iyo barashada laakiin mar | Aniga/ururkaygu wuxuu si joogto ah oo taxadar leh u qorsheeyaa hawlahayaga u qareemidda ka hor inta aanan fulin. Waxaan ka fekernaa nooca hawlaha u qareemidda ee loo baahan yahay si wax looga qabto caqabadaha waxbarashada loo dhan yahay ee bulshadeena iyo nooca doorka u qareemidda aniga/anaga waxaan u baahanahay inaan ciyaarno. Milicsiga joogtada ah iyo waxbarashadu waxay ku dhex milmeen shaqadeena u qareemidda urur ahaan. |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | waxaan u baahanahay in aan ciyaarno ama sida aan aniga/anaga wax uga baran karno waxa aan samayno. | muhiim u tahay in aan wax ka barano waxa aan sameyno. Laakin aniga/anaga ma hubno sida loo hirgaliyo ficil ahaan. | walba tan kuma dhaqano. | |

## Lifaaqa 9aad: Qaabka warbixinta ee hawlaha u qareemidda

| Maxaa hagaagay? |
| --- |
| |
| **Waa maxay caqabadaha jiray?** |
| |
| **Maxaanu ka baranay?** |
| |
| **Talooyinka mustaqbalka** |
| |

# Lifaaqa 10aad: Sharaxayaasha/tilmaamaha sawirka

**Sawirka 1:** [Sawirka waxa uu muujinayaa sideed jeldi buuggaagta tababarada iyo midka gacanqabsiga. Jeldiyada waxa ay leeyihiin qoraalo iyo sawiro. Afarta ugu horeysa ee sare waxa ku qoran "Hordhaca Waxbarashada loo dhan yahay ee ururada dadka la nool baahiyaha gaarka ah (xirmada 1), Iskaashiga Waxbarashada loo wada dhan yahay (xirmada 2), aqoonsiga carruurta/ardeyda ka maqan dugsiyada (xirmada 3), xeelada joogteynta iyo u qareemidda Waxbarashada loo dhan yahay ee ururada dadka la nool baahiyaha gaarka ah (xirmada 4); kuwani waa hagaha tababarka. Kuwa kale ee hoose waxa ay wadagaan isku cinwaan laakiin kuwani waa "buuggaag gacanqabsiga". Dhamaan waxa ay leeyihiin calaamadaha hay'adaha ADRA, Save the Children, DAF, PDON, NAD & EENET].

**[Sawirka 2:** Waa sawir muujinaya shan qof oo taagan bandhigga boor weyn hortiisa, kaasi oo ku qoran "maalinta aragga aduunka". Waxaa sidoo kale muuqda boorka istaagga ee boorka weyn hortiisa. Mid waxa ku qoran "maalinta aragga aduunka", midka kale waxa ku qoran "hay'adda gargaarka naafada". Midka ka mid dadka taagan waa wasiirkii hore ee wasaaradda waxbarashada dowlad goboleedka Koonfur Galbeed. Waxa uu u dhowaanayaa nin da' ah oo xiran funaanad ay ku dhegantahay calaamadda "jeclow indhahaaga", waxa uu u dhiibayaa alaab cad oo yar. Waxa ninka da'da ah ku xiga nin kale oo xiran isla funaanadii oo haysta usha cad oo ay isticmaalaan dadka arraga la' taasi oo u muuqata mid cusub. Labada qof ee kale oo ku aadan ayaa fiirinaya wasiirka.]

**Sawirka 3-aad:** waa sawir haweeney ku fadhida darin gurigeeda. Dhanka bidix waxa ka xiga haweeney kale oo gacanta ku haysa buugyare oo wax ka tilmaameyso. Haweeneyda kale waxa ay fiirineysaa waxa ay haweeneyda kale tilmaameyso. Waxa halkaasi jooga saddex carruur yaryar oo la fadhiya haweeneyda. Laba ka mid ah waxa la fadhiya darinta halka midkale ay dhabta ku hayso. Canugga yar waxa uu u muuqdaa mid aan fadhiisan Karin keligiis inkastoo uu u egyahy mid qiyaastii jira shan ilaa lix sano.

**[Sawirka 4:** Waa sawirka laba gabdhood oo isku da' ah oo isla fadhiya. Sawirka bidix waa gabar ku fadhida gaariga naafada ah. Waxa ay gacanta ku haystaa boorsada dugsiga iyadoo u dhoolacadeyneysa sawirqaadaha. Sawirka midig, waxa ka muuqda isla gabadhii oo ku fadhida gaariga naafada oo ku jirta fasal, jooga miis ka hooseeya kuwa kale. Waxa kale oo ka muuqda carruur ku fadhida miisas u dhow gabadha.]

[**Sawirka 5**: waa sawir muujinaya afar qof. Waxa ay taaganyihiin banaanka dhisme yar ka sameysan bacweyne. Waxa ay eegayaan laba wee loo wax lagu

kariyo. Dhinaca Kale oo shishe ee gadaale waxa ka muuqda xirmo weyn oo xaabo/qoryo ah.]

**Sawirka 6:** Jaantusku waxa uu muujinayaa saddex sawir-sumadeed oo ay falaari isku-xirtay oo si goobo ah u sawiran. Sawirka koowaad ee ugu sareeya, oo erayga FIIRI uu ku qoran yahay xarfaha waaweyn oo jaranjarta raacaya sida la arki karo. Dhinaca hoose, waa gaariga naafada. Sawirka labaad ee dhinaca midig ee hoose wuxuu muujinayaa qof gaari naafada adeegsanaya iyo qof kale oo la hadlaya sida sanduuqa hadalku muujinayo iyo erayga FEKER oo xarfaha waaweyn ku qoran. Sawirka saddexaad waxa uu muujinayaa qof adeegsanaya gaari naafada, nin iyo naag wada taagan. Naagtu waxa ay gacanta ku haysaa tabeele ay ku qoran tahay SAMEE oo xarfaha waaweynah.]

**Sawirka 7:** waa sawirka nin hal lug leh, oo ku xiran suut isla markaasna isticmaalaya usha lagu tukubo. Waxa uu taaganyahay banaanka albaabka guri. Albaabka waa uu furanyahay. Haweeney ayaa taagan albaabka furan oo la hadleysa ninka. Dhar caadi ah bay xirantahay. Gacmaha ayey ka hadleysaa sida iyadoo wax sharaxeysa. Albaabka gadaashiisa waxa joogta gabar dhulka nadiifineyso.]

**[Sawirka 8:** Waa sawir laba qof iyo wiil ku fadhiya kuraas si wareeg ah qol dhexdiisa. Qof haweeney ah ayaa la hadleysa qof kale kaasi oo dhegeysanaya waxa ay sheegeyso. Waxa ay sidataa bug xusuusqor ah. Wiilka yar waxa uu daawanayaa oo uu dhegeysanayaa labada qof.]

**Sawirka 9:** Waa sawir saddex qof iyo labo haween oo taagan, indha indheynaya dhisme cusub oo la dhisaayo. Waxa la arkayaa alwaaxyo waaweyn iyo darbi ka sameysan bullakeeti oo goor dhow la dhisey. Dhinaca midi gee sawirka waxa ka muuqda aasaaska dhismaha ee aan weli darbiga la dhisin. Midka mid ah ragga ayaa gacanta ku haysta buug.]

**Sawirka 10:** Waa sawirka 9 qof oo u fadhiya qaab wareeg ah qof dhexdiisa o oleh saddex daaqadood. Daaqadda waxa ka muuqda dhisme u eg dugsi. Kooxda dadka ah waxa ka mid ah qof ku fadhiya gaariga dadka naafada, waxan ku xiga qof da' ah oo haysta usha lagu tukubo. Waxa sidoo kale dhinaca ka xiga gabar xidhan dharka dugsiga iyadoo lugta ka go'antahay, haysta usha lagu tukubo. Waxa kale oo fadhiya laba haween ah. Dhinca kale, ninka ku fadhiya gaariga naafada, waxa xiga haweeney gacmaha ka hadleysa iyo wiil yar oo wada usha cad. Waxa dhinac fadhiya nin iyo naag. Kooxda waxa ay dhegeysanayaan haweeneyda gacmaha ka hadleysa, waxa ayna u muuqdaan kuwa welwelsan.]

**[Sawirka 11**: Waa sawir afar qof iyo labo wiil oo u taagan qaab wareeg ah. Waxa ay ag taaganyihiin guryo ka sameysan bacweyne. Haweeneyda dhanka

bidix taagan ayaa gacanta ku haysata buugyare, waxa ayna tilmaameysaa waxa ku qoran buugyaraha. Labada carruur iyo labo ka mid dadka ayaa eegaya buugyaraha. Haweeneyda dhanka midig taagan ayaa gacanta ku haysa waraaqyo wax ayeyna ku qoreysaa.]

**Sawirka 12:** Waa sawirka gabal warqadda ah sabuurad u sameysan. Dhanka sare ee sabuuaradda waxa ku qoran cinwaan “Kooxda kow 16/8/2022”. Jaantuska waxa uu leeyahay saddex wareeg oo bartanka ah. Bartamaha waxa ku qoran “Activity and Assets”. Dhanka banaanka waxa ka muuqda xariiqmo u eg xidigaha kaasi kala baraayo labada wareeg. Qeybaha wareegga labaad, waxa ku qoran noocyo kala duwan oo shaqooyin ah hase ahaate, qoraalka ma cadda, wayna adagtahay in la akhriyo. Qeybaha wareegga saddexaad, waxa ay u muuqataa mid la akhrin karo qeyb walba oo shaqooyinka. Kuwa sahlan akhrintooda waxa ka mid ah Masaajidyo, hogaanka diinta, gudiga waxbarashada ee bulshada (CEC), gudiga loo dhanyahay ee dugsiga (SIT), wasaaradda waxbarashada (MOE), bulshada tuulada, odayaasha tuulada iyo warbaahinta.]

**Sawirka 13:** Waa sawir ka kooban shan qof oo taagan darbiga dhisme dugsi, kaasi oo la rinjiyeeyey. Darbiga waxa ku xardhan xarfo waaweyn” DUGSIGA HOOSE/DH/EE ISKUDHAFKA MUSTAQBAL. Hoosna waxa ku qoran ereyo ‘MUSTAQBAL INTEGRATED PRIMARY SCHOOL. Dhinaca kale, waxa ka muuqda xarfo yaryar oo ay adagtahay in la akhriyo iyo caalamada dugsiga. Caalamada dugsiga hoosteeda waxa ka muuqda sawirka gabar iyo wiil yar oo u socda dugsi. Shan qof way taaganyihiin qaab toosan, waxa ay fiirinayaa kaamirada wayna dhoolacadeynayaan.]

**[Sawirka 14:** Waa sawir koox dad ah oo ka kooban toban qof oo fadhiya meel banana. Qaar waa ay fadhiyaan, halka kuwa kale ay taaganyihiin. Haweeneyda fadhida ayaa haysta usha ay isticmaalaan dadka arragga la’. Haweeney kale oo taagan ayaa gacmaha ka hadleysa oo xiriir la sameyneysa nin kale. Dhamaan dadka waxa ay eegayaan oo dhegeysanayaan haweeneyda taagan oo dhoolacadeyneyso oo ku hadleysa cod baahiye. Waxa ay gacanta ku haysataa gabar kale oo boors wadata. Gabadha waxa ay eegeysaa haweeneyda wayna dhoolacadeyneysaa. Nin hal lug la’ oo fadhiya dhinaca haweeneyda isticmaaleysa cod baahiyaha. Usha lagu tukubo ayaa taala dhulka. Dhanka gadaal, waxa ka muuqda dukaamo, masaajid, dad socda iyo kuwa fadhiya dhulka.]

**Sawirka 15:** Waa sawir xaruun raadiye. Labo qof ayaa fadhiya miis weyn istuudiyaha dhexdiisa, cod baahiye weyn gadaashiisa. Mid ka mid ah labada qof ayaa ku hadlaya microfoonka weyn, waxa gadaal ka xiga qalab lagu habeeyo

codadka oo ku dhegan darbiga, waxa sidoo kale ka muuqda daaqad weyn iyo kursi.]

**[Sawirka 16:** Waa qof ku hadlaya microofan. Gadaashiisa waxaa taagan qof turjumaya oo ku tilmaamaya luuqadda suundhabaalaha. Waxaa gadaashooda yaala boor, waxa ku qoran boorka" TODOBAADKA CAALAMIGA EE DADKA MAQALKA LA'", hoos waxa ku qoran "MAALINTA CAALAMIGA EE LUUQADDA SUUNDHABAALAHA". Waxa kale oo jira qoraalo Af- Soomaali iyo Ingiriis ah oo ku qoran boorka iyo jaantuus laba gacmood ah.]

**[Sawirka 17:** Waa sawir muujinaya shan qof oo fadhiya qol. Kalandhar ayaa ku dhegan darbiga. Dhinac midig, waxa fadhiya nin aad u lebisan miis agtiisa. "Gudoonka waxbarashada ee degmada" ayaa ku qoran miiska. Waxbuu dhegeysanayaa. Waxa u ku aadanyahay afar qof oo ku fadhiya miisas, saddex waa dad waaweyn iyo canug. Miiska waxa u dhow haweeney haysta usha lagu tukubo. Gacmaha ayay kala hadleysaa oo wax bay u sharaxeysaa ninka. Waxa ay gacmaha ku sidataa waraaqo ka muuqda calaamadda dowladda. Waxa ku xiga wiil haysta usha cad, waxaana ku xiga oo la fadhiya nin iyo naag.]

**Sawirka 18**: Waa sawirka jeldiga hore eel aba dukumenti. Midka bidix wax ka muuqda calaamadda astaanta qaranka, hoosna waxa u uku qoran midabka buluugga ah "Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Soomaaliya (Ingiriis iyo Soomaali). Cinwaankan hoostiisa waxa ku qoran, dastuurka qabyoqoraalka ah, 1, Agoosto 2012, Muqdishu, Soomaaliya. Jeldiga dukumentiga kale ee bidix sidoo kale waxa uu wataa calaamadda astaanta qaranka, waxana ku qoran 'DOWLADDA FEDERAALIGA AH EE SOOMAALIYA, WASAARADDA WAXBARASHADA oo midab cagaar ah. Qeybta hoose ee cinwaanka ee dukumentiga, waxa ku qoran, SIYAASADDA QARAN: BAAHIYAHA GAARKA AH, NAADAFA IYO WAXBARASHAD LOO DHANYAHAY, December 2018.]

[**Sawirka 19:** Waa sawirk muujinaya qaabka fudud ee jaantuska 'FIIRI-FEKER-SAMEE' ee dhexda ku jirta iyo sawiro balaaran eek u aadan geesaha. Sawirka ku xiga 'FIIRI' waxa uu muujinayaa qof hal lug leh, oo xiran suut oo isticmaalya usha lagu tukubo. Waxa uu taaganyahay banaanka guri. Albaabka waa uu furanyahay. Haweeney ayaa taagan albaabka furan oo la hadleysa ninka. Dhar caadi ah bay xirantahay. Gacmaha ayey ka hadleysaa sida iyadoo wax sharaxeysa. Albaabka gadaashiisa waxa joogta gabar dhulka nadiifineyso. Sawirka ku xiga 'FEKER', waxa ka muuqda todobo qof oo ku shirsan geed hoostiisa, afar ka mid ah waa ay fadhiyaan halka saddexna ay taaganyihiin. Shanta qof ee fadhida waxa ay dhageysanayaan ninka hadlaya. Ninka waxa uu xiranyahy suut, hal lug kaliya ayuu leeyahay, wuxuna isticmaalayaa usha lagu socdo. Waxa uu barbar taaganyahy sabuurad (flipchart) ka muuqda calaamado (wiil & gabar). Dhinaca kale ee sabuurada waxa taagan haweeney, gacmaha ka

hadleysa. Haweeneyda iyo ninkaba waxa ay ku aadanyihiin oo xiriir la sameynayaan kooxda shanta qof ee kale. Sawirka ku xiga “SAMEE”, waxa uu muujinaya koox dad ah oo ka kooban toban qof oo ku kulansan meel banaan ah. Qaar waa ay taaganyihiin halka kuwa kale ay fadhiyaan. Haweeney dadka fadhiya ka mid aha haysta usha ay isticmaalaan dadka arraga la’. Haweeneyda taagan ayaa gacmaha ka hadleysa oo nin kale ayey xiriir la sameyneysaa. Dhamaan dadka waxa ay eegayaan oo ay dhegeysanayaan haweeneyda taagan, dhoolacadeyneysa oo adeegsaneysa cod baahiye. Waxa barbar taagan gabar yar oo wadata boors. Gabadha waxa ay eegeysaa haweeneyda wayna dhoolacadeyneysaa. Nin hal lug la’ oo fadhiya dhinaca haweeneyda ayaa isticmaaleysa cod baahiyaha. Usha lagu tukubo ayaa taala dhulka. Dhanka gadaal, waxa ka muuqda dukaamo, masaajid, dad socda iyo kuwa fadhiya dhulka.]

**[Sawirka 20:** Waa sawirka shan qof oo ku fadhiya kuraas midab buluug ah qaab wareeg ah. Waxa ay fadhiya geed hoostiisa, dhanka dhismaha dugsiga. Waxa ay u muuqataa ina dadkani ay kulan leeyihiin.]

[**Sawirka 21: B**annaanka waxa taagan saddex qof oo wada hadlaya. Mid ka mid ah habeenka waxa ay gacanta ku haysa warqad jaale ah oo ay u taagayso dadka kale. Nin ku xigga waxa bannanka dhismaha ku dhejinaya warqad leh midab jaale ah oo cinwaankeedu yahay ‘Dugsiga loo wada dhan yahay’. Gadaal waxa jooga nin warqado siinaya labo qof oo meel wada fadhiya oo wada hadalaya. Waxaa ka sii dambeeya ri iyo guryo iyo nin iyo wiil wax beeraya.]

**[Sawirka 22:** Waa sawirka lix qof oo si wareeg u fadhiya miis, iyagoo hadlya. Dhinac bidix ee sawirka waxa ka muuqda boor ay ku qoranyihiin calaamado kala duwan TOGETHER FOR INCLUSION (TOFI), INCLUSIVE EDUCATION CAPACITY BUILDING TRAINING FOR OPD FACILITATORS IN SOMALIA. Gadaal, waxa ka muuqda qeybo ka mid ah sabuurado (flipcharts) oo darbiga ku dhegsan oo qoraalo leh. Kooxda dadka ah ee fadhiya wax bay ka wada hadlayaan. Miiska waxa saran caagado yaryaro oo biyo ah, sameecad iyo mobeelo iyo laba karaka magacyada ah. Midka mid ah kaararka waxa ku qoran IBRAHIM(WARIYE), midka kale waxa ku qoran JEYLANI(WARIYE). Waxa kale oo miiska saran cod baahiye.]

[**Sawirka 23:** waa sawir qof taagan sabuurad(flipchart) agteeda, waxa u ku hadlayaa cod baahiye. Sabuuradda waxa ku qoran cinwaan weyn oo INDHEERADKA JUBALAND, hoosna waxa ku qoran

A. Waxan la hadalney
- Maamulka dugsiga
- Macalimiinta
- Ardeyda

- Gudiga waxbarashada ee bulshada

B. Waxaan maqalney:

- In waxbarashada loo dhanyahay lagu dhaqmo dugsiyada dhamaan carruurta baahiyaha gaarka qabta iyo kuwa aan qabinba si isku mid ah

C. Waxa odhan karnaa:

- Dugsiyada qaar ma ahan kuwa loo dhanyahay (ma jiro deegaanka u diyaarsan dhamaan ardeyda)
- Dugsiyada qaar ma lahan meelo/goobo ay ilmuhu ku ciyaaraan
- Meelaha laga galo fasaladda uma diyaarsan dhamaan carruurta baahiyaha kala duwan qaba, qaar baa jaranjaro leh.]

**Sawirka 24:** Waa sawir mujina gudaha shir ka dhacaayo qol. Waxa ka muuqda miisas qaabeysan iyo dad fadhiya oo dhageysanaya qof ku hadlaya cod baahiye. Qiyaastii dad 30 qof ka kooban baa fadhiya miisaska.]

**[Sawirka 25:** Sawirka waxa uu muujinaya laba boor. Labada boor waxa ku qoran'school for everyone' iyo 'every girl and boy has a right to a good quality, inclusive education'. Boorka midig waxa uu leeyahay afar sawir oo weyn and waxa bartanka ka qoran su'aashan soo socota 'maxaa ka dhigaya dugsiyada kuwa loo wada dhanyahay'. Jumlada soo socota ayaa ku qoran afarta sawir. Dugsiga waa mid amaan ah soo dhoweynaya carruurta takoor la'aan; dugsiga, waalidiinta iyo bulshada si wadajir ah bay u shaqeeyaan; dugsiga waxa uu kor u qaadaa kaqeybgalka, wadashaqeynta iyo kalsoonida; dugsiga waxa uu sameeyaa xirfadaha fudud eek u haboon nolosha carruurta. Boorka bidix waxa ka muuqda koox dad ah oo shiraya. Qeybta hoose, waxa uu ka leeyahay falaaro dhanka bidix ilaa midig kaa gaaraya, oo ku qoran 'ka saaridda, ka qeybnoqoshada'. Waxa sidoo kale ka muuqda dhanka midig jaantus ay ku qorantahay 'waxbarashada loo dhanyahay' bartamaha iyo afar erey 'waxbarasho, 'fursad' 'sinaan' iyo tayo' mid walba oo ku xiran. Qeybta hoose waxa ku qoran laba cinwaan 'si loo kordhiyo ka qeybnoqoshada, xaqiiji in dhamaan oraahyadan kuwa dhab ka ah dugsiyadiina' iyo 'xusuusnow'. Boorka bidix waxa uu leeyahay qoraalo iyo nuqulo ka badan midka midig xiga.]

[**Sawirka 26:** Gabar fadhida dhulka oo wejiga jilbaha ku haysa oo aan wejigeeda la arki karin. Afar gacmood ayaa afarta dhinac ka tilmaamaya sawirka. Afar summadaha hadalka ayaa gacmaha u dhexeeya. Summadaha hadalku waxa ay leeyihiin;" qoyskeedu kama faa'iideen', 'waxba lama bari karo', 'aad u gaabis ah' iyo 'waxba ma baran karto'.]

[**Sawirka 27:** sawirka waxa uu muujinayaa sided tusaale oo kala duwan oo ku saabsan 'dhibtu waa nidaamka waxbarashada' oo isku xiriirsan.

- Tusaale 1-aad: wiil xiran dharka dugsiga oo boorso dhabarka ku wara oo koraya jaranjaro. Erayga 'Dugsi Sare' ayaa lagu qoray xagga sare ee

jaranjarada. Saddex caruur ah ayaa taagan xagga hoose ee jaranjarada. Caruurta waxaa ka mid ah cunug maro guntan oo kor u eega wiilka. Gabar cunug dhabarka ku sida oo u eg mid caraysan iyo wiil xiran ookiyaale madow oo ul sita oo dhinaca kale u socda. Eragy 'Dugsi hoose' ayaa ku qoran xagga hoose ee jaranjarada.

- Tusaale 2-aad: waxa uu muujinayaa laba qol oo ku qoran "suuliga wiilasha iyo' suuliga gabdhaha'. Waxa ka muuqda carruur labo saf ku jirta, mid waa gabdho, midna waa wiilal. Dhinaca bidix, waxa jooga cunug ku kaadshada meel dugsiga gadaashiisa ah. Dugsiga dhismihiisu ayaa gadaal ka muuqda.
- Tusaale 3-aad: Wiil ku fadhiya gaariga naafada ee uu leeyahay, oo fiirinaya dhulka. Waxaa dhiniciisa ah jaranjaro dhowr salaan leh oo loo baahan yahay inuu koro si uu fasalka u galo. Albaabka waxaa ka muuqata macallimad wax dhigaysa.
- Tusaale 4-aad: Haweenay taagan ardayda horteeda oo tilaamaysa oo la hadlaysa ardayda dharbarkeeda fadhida. Arday fasalka hortiisa fadhiya ayaa daaqada eegaya, mid kalena gacmihiisa ayuu barkaday.
- Tusaale 5-aad: waxa uu muujinayaa saddex oo is dul saaran, qalin-qori, qalin iyo tirtire oo ay ku wareegsan tahay goobo ay dhexda ka kala bartay xariiq.
- Tusaale 6-aad: Gabar qaangaar ah oo aan xirnayn dharka dugsiga oo cunug dhabarka ku xambaarsan. Gabdhu waxa ay taagantahay dugsiga dibadiisa oo waxa ay fiirinaysaa dugsiga. Labo gabdhood oo xiran dharka dugsiga ayaa taagan dugsiga hortiisa oo soo eegaya gabadha oo la hadlaya.
- Tusaale 7: waxa uu muujinayaa fasal arday badan fadhido. Macallin ayaa ka muuqda fasalka hostiisa, isaga oo tilmaamaya qoraal ku qoran sabuurada. Derbiyada iyo daaqadaha fasalku waa kuwo burbursan.
- Tusaale 8-aad:  xariiq cas lagu kala teeday. Sawirka bidixda wuxuu muujinayaa dhisme ay ku qoran tahay SIYAASADAHA WAXBARASHADA. Waxaa ka dambeeya dayr silig ah. Daaqadaha waxaa ka muuqda xirmooyin waraaqo ah oo si nidaam ah u safan. Sawirka dhinaca midig ka muuqda nin iyo haweenay hor taagan guri mudug ah. Gacmaha ayey taagayaan sidii dad aan is fahmayn. Sali guriga hortiisa yaala waxaa ku jiifa cunug hal lug leh

**Sawirka 28:** waa sawir muujinaya fasal ay boorar ku dhiganyihiin darbiyadiisa, waxa sidoo kale yaala kuraas dhinac darbiga. Waxa roogga dhulka fadhiya koox yar oo carruur ah. Qaybta hore ee sawirka, waxa fadhiya laba wiil oo ka wada shaqeynaya gabal sabuurad ah. Mid ka mid ah wiilasha ayaa wax ku sawiraya ama qoraya sabuurad(flipchart) halka midka kale uu eegayo. Gadaaashooda waxa jooga koox gabdho ah oo ka wada shaqeynaya gabal sabuurad ah.

[**Sawirka 29:** waxa ka muuqda todobo qof oo ku shirsan geed hoostiisa, afar ka mid ah waa ay fadhiyaan halka saddexna ay taaganyihiin. Shanta qof ee fadhida waxa ay dhageysanayaan ninka hadlaya. Ninka waxa uu xiranyahy suut, hal lug kaliya ayuu leeyahay, wuxuna isticmaalayaa usha lagu socdo. Waxa uu barbar taaganyahy sabuurad (flipchart) ka muuqda calaamado (wiil & gabar). Dhinaca kale ee sabuurada waxa taagan haweeney, gacmaha ka hadleysa. Haweeneyda iyo ninkaba waxa ay ku aadanyihiin oo xiriir la sameynayaan kooxda shanta qof ee kale.]

[**Sawirka 30:** Waa sawir fasal gudihiisa. Gadaal fasal waxa yaala miiska dugsiga. Tiro carruur ah ayaa fadhiya dhulka. Wiilasha waxa u fadhiyaan qaab jiif ah dhanka bidix ee sawirka halka gabdhaha ay fadhiyaan dhanka midig. Bartanka waxa joogta haweeney. Waxa ku tiirsantahay mid ka mid ah gabdhaha oo ay wax tuseyso.]

[**Sawirka 31**: Jaantuska waa uu muujinaya 'raadraaca mataanaha'waxa uuna muujinayaa sawiro dhinac bidix 'diiradda saar nidaamka' iyo midka midig 'diiradda saar ardeyga'. Sawirka dhanka bidix waxa ku jira todobo qof oo fadhiya miis weyn, waxa ka mid ah 3 dumar ah iyo 4 nin. Midka mid ah dumarka ayaa ku fadhida gaariga dadka naafada ah. Qaar ka mid ah dadka way isla hadlayaan. Waxan hortooda yaala gabalo waraaqado ah oo wax ku qoran iyo qalimaan. Gadaal qolka waxa jooga qof wax ku qoraya sabuurad. Waxa ku qoran sabuuradda erayo 'tababarka macalimiinta ee waxbarashada loo dhanyahay, maalinta 2'. Sawirka kale ee midig, waa ardey ku jirta fasal. Waxa ku jira boorar qoraalo ku qoranyihiin. Waxa ay ku fadhiyaan miisas, laba labo ayey u shaqeynayaan. Waxa ka mid ah ardeyda mid arraga la' oo isticmaalaya farta bareelka. Waxaana ku xiga qof ku tiirsan oo dhiiragelinaya. Dhanka kale, waxa ka muqda haweeney caawineysa gabar yar. Gadaashooda waxa taagan nin sawirkii koowaad ku jirey oo fiirinaya isla markaasna dhoolacadeynaya].

**[Sawirka 32:** waa sawirka kaa kooban sagaal qof oo taagan, gacanta ku haya boor weyn oo cad. Qeybta cas ee boorka waxa ku qoran 'waxbarashada loo dhanyahay' qeybta hoose ee buluug ah waxa ku qoran 'dhaqaajinta awoodsiinta dhaqaalaha'. Dhamaan dadka waxa ay wada xiranyihiin funaanado midab cagaar ah leh. Midka mid ah dadka haya boorka ayaa wata usha cad iyo mid ka mid jilbaha dhulka dhigtey hayana boorka.]

[**Sawirka 33:** waa sawirka qolka lagu shiro/hotel. Waxa yaala miisas lagu dadey maro cadcad oo qolka lagu habeeyey. Dad badan ayaa qolka fadhiya miisaska. Waxa miiska saran caagado biyo ah. Waxa sidoo kale yaala qolka miis yar oo maro cad ku dadan, waxana fadhida haweeney laptop wadata. Waxa Meesha yaala kaamirad, mobeelo, dhowr xabo caagado biyo ah and projector. Dhinaca

miiska waxa taagan qof haysta cod baahiye, waxa uu la hadlyaa dadka qolka jooga.]

[**Sawirka 34:** Koox dad ah oo ku fadhiya kuraas habaysan oo u jeeda qof hadlaya oo aan sawirka ka muuqan. Kooxda waxaa ka mid ah haweenay ku fadhida gaariga naafada, nin baras qaba oo gacanta kor u taagaya, haweenay xijaaban oo dadka hor taagan oo gacanta taagaysa. Labo qof oo kale oo iska soo horjeeda oo hadlaya. Erayga GOLAHA SHACABKA oo far waaweyn ku qoran ayaa sawirka hoostiisa ku qoran.]

**[Sawirka 35**: waa sawir laba dumar ah iyo canug yar oo taagan dhismaha hortiisa oo sawiro lagu midebeeyey. Waxa halkaas fadhida haweeney haysta buugyare dhabteeda, wayna eegeysaa. Dhabarkeeda waxa taagan gabar yar oo fiirineysa buugyaraha. Waxa sidoo kale joogta haweeney taasi oo la hadleysa haweeneyda kale. Waxa ay gacanta ku haysaa nuqul ka mid ah buugyaraha iyo mobeel.]

**[Sawirka 36:** waa sawir qol qaab jiifjiif ah kuraas loo dhigey oo ku fadhiyaan dad. Qaarkood waa dad waaweyn halka qaar ay yihiin kuwa yaryar. Qeybta hore waxa fadhiya lix carruur ah. Laba ka mid ah carruurta ayaa xiran funaanado cadcad, taasi oo ku qoran ‘ ururka naafada ee Qardho’.]

**Sawirka 37:** waa sawir qof tilmaamaya qoraalo lagu qorey sabuurad (flipchart). Ninka waxa uu taaganyahay bartanka sawirka, gadaal sabuuradda. Waxa suuragal ah in la arko qaarka mid ah qoraalada ku qoran sabuuradda ‘horudhac Aqoonsiga Ardayda Dugsiga ka Maqan’ dhanka bidix, waxa yaala sabuurad yar oo qoraalo ku qoranyihiin. Lama akhrin karo qoraalada mana kala cad wax ku qoran. Ninka waxa ku tilmaamayaa gacantiisa bidix, waana dhoolacadeynayaa. Waxa uu ku tiirsanyahay usha lagu tukubo.]

**[Sawirka 38:** waa sawirka ka kooban sided qof kuwaas oo ag fadhiya miis caag ah. Qaar ka mid ah waxa ay haystaan waraaqo. Way isla hadlayaan. Dhamaantood waxa ku fadhiyaan kuraas caag ah marka laga reebo hal qof. Waxa u uku fadhiyaa gaariga naafada oo ku shaqeeya korontada.]

[**Sawirka 39**: waa laba sawir oo laysku dhejiyey. Midka dhanka midig waxa uu muujinayaa kursi caag ah oo yaala qol darbiyadiisa shib ka sameysan. Kursiga waxa u uku taaganyahay shibka, qaab afar gees ah u sameysan fadhigiisa. Waxa ku yaala god kursiga hoostiisa. Sawirka dhanka bidix, waxa uu muujinaya weel weyn caag ka sameysan oo biyaha lagu qaado. Qaabdhismeedka caaga waa meter iyo bar ayuu dhulka u jiraa. Weelka waxa ku haya xarig. Waxana ku sii xiran gacan iyo xarig dheer ul ku xiran oo dhulka yaala.]

**[Sawirka 40**: waa sawir saddex qof iyo laba carruur ah oo fadhiya miis. Dhanka midi gee sawirka, waa wiil yar oo fadhiya miis caag cagaar ah, gacmihiisa waxa

ay saaranyihin mashiinka bareelka. Ninka waxa uu xiranyahay jaakad ku daabacan calaamadda ADRA. Dhanka midi gee wiilka, waxa fadhida gabar yar oo madaxeeda raariceysey oo dhageysaneysa waxa la sheegaayo. Laba qof kale ayaa taagan dhinaca gabadha oo tiirsan miiska oo eegaya waxa dhacaya. Gadaal waxa carruur kale ku fadhiya kuraas caag ah halka miisaska ay ku jeedaan dhankooda, waxa ayn eegaya islamarkasna dhageysnayaan waxa dhacaayo.]

**Sawirka 41:** waa sawir fasal gudihiisa. Sawirka waxa laga qaadey dhanka albaabka kaasi oo furan, waxana ku jira koox ka kooban siddeed qof oo taagan. Way dhoolacadeynayaan, saddex ka mid ahna way gacan haatinayaan. Waxa ay aadanyihiin carruurta fasalka ku jirta kuwasi oo ku fadhiya kuraas iyo miisas ka sameysan alwaax. Mid ka mid carruurta fadhida ayaa gacantiisa kor u qaadaya. Qeybta hore waxa ka muuqda sabuurad, waxa kale oo taagan nin iyo gabar yar oo taagan sabuuradda horteeda oo dad kale eegeysa.]

[**Sawirka 42:** waa sawirka gabar joogta banaanka fasal ee dugsiga. Gabadha yar waxa ay isticmaaleysaa gaariga dadka naafada ah, waxayna ku wadataa boorsada dugsiga dhabteeda. Waxana ku riixaya gaariga haweeney dhanka dhismaha shibka ah. Waxa gadaal ka xiga darbi ay ku xardhanyihiin qoraalo.]

**[Sawirka 43:** waa sawir laba gabdhood oo fadhiya miis fasalka dugsiga. Waxa ay xiran dharka dugsiga. Gabadha yar oo xigta dhanka bidix ayaa haysata sawir. Gabadha fadhida eek u xigta ayaa xiran muraayado, waxa ayn haysataa buug wax ku qoranyihiin oo miiska saran.]

[**Sawirka 44**: Bartamaha warqadda waxaa dhigan saddex goobaabin oo u habaysan saddex xagal. Goobada koowaad ee bidixda waxaa ku qoran ereyga "dad", midda xigta waxaa lagu qoray "ururro" halka goobada saddexaadna uu ku qoran tahay "khayraad". Saddexda goobaabood waxaa la iskula xiray xarriiqo madow.

Goobada "dadka" waxaa hareeraha ka xiga afar goobo oo yaryar oo ku wada xiriirsan xariiq madow. Mid ka mid ah goobooyinka yaryar waxaa ku jira oday bakoorad sita, waxaana ku dhex qoran "Mr P. macallin hawl-gab ah", hoostana waxaa kaga dhigan "wuxuu gacan ka gaystaa la hadalka waalidka". Mid kale oo ka mid ah goobooyinka yaryar ayaa waxaa ku yaal sawirka nin dhallinyaro ah oo isticmaalaya harqaan, hoostiisana waxaa ku qoran "Mr. K dawaarlaha". Goobo kale oo yar ayaa muujinaysa masjidka iyo "Imaam". Goobabada yare ee kalena kuna xidhan goobabada dadka waxaa ka muuqata sandaqad. Bannaanka sandaqadda dad baa fadhiya. Laba ayaa isla sheekeysanaya, ninna wax buu cunayaa. Gadaashoosha kirli baa dab saaran.

Goobada "ururrada" waxaa ku wareegsan saddex goobo oo yaryar kuna xiriirsan xaqiiq madow. Goobada ugu horeysa ee yar ayaa leh sawirka darawalka tuk tuk waxaana hoostiisa ku qoran "Ururka darawallada tuk tuk". Goobada yar ee xigta waxa ku yaal sawir koox dumar ah oo fadhi ku sheekaysanaya waxaana ku hoos qoran "Ururka haweenka xaafadda". goobada yar ee saddexaad ayaa lagu qoray "Kooxda dhallinyarada" hoostana waxaa kaga sii taal "waxay caawiyaan qaybinta buugaagta yar yar".
Goobada khayraadka waxaa ku hareeraysan lix goobo oo yaryar oo ay isku xirayso xarriiq madow. Midka hore waxa ku yaal sawirka "Malcamad". Goobada yar ee xigta waxaa ku sawiran haweeney iibinaysa khudaar iyo hoobaan waxaana hoos ku qoran "Suuqa Khudaarta" iyo weedha "dhirta dugsiga" oo bilo ku jirta.  Goobada saddexaad waa sawirka dhisme daaqado badan bartamahana ku leh saacad weyn. Daartan bannaankeeda waxa ku dheggan calaamad ay ku qoran tahay “Jaamacad” waxaana tabeelaha horteeda ku yaal ku sheekaysanaya saddex qof. Goobada yar ee xigta waxay leedahay sawirka darawal tuk tuk ah oo wata rakaab. Sawirkaan hoostiisa waxaa ku qoran "darawal tuk tuk" oo ereyga "gaadiid" ku dhex jiro. Waxaa jira laba goobo oo yaryar oo kale oo ku xiran kheyraadka - mid waxaa ku qoran erayga "webi" iyo sawirka webi, kan kalena ereyga "dhul.